# WAD HAWEEN

## Gudniinka Fircooniga



Qoraa: Ubah Abdullah Aden

# Tusmo


Hibeyn ....................................................................................4

Afeef ....................................................................................4

Hordhac ....................................................................................5

Mahadnaq ....................................................................................6

Mahadnaq ....................................................................................7

Dulmarka buugga ....................................................................................8

Dulmarka buugga ....................................................................................9

**CUTUBKA 1-AAD ....................................................................................10**

Taariikhda gudniinka Fircooniga ....................................................................................11

*Sida uu gudniinka Fircooniga ugu baahey dunida* ....................................................................................12

*Tirokoobka gudniinka Fircooniga ee dunida* ....................................................................................12

*Sababaha loo sameeyo gudniinka dumarka* ....................................................................................17

**CUTUBKA 2AAD ....................................................................................18**

*Diinta iyo gudniinada gabdhaha* ....................................................................................19

**CUTUBKA 3-AAD ....................................................................................20**

*Gudniinka Fircooniga waxa uu yahey iyo noocyada uu kala baxo* ......21

*Galabsiga gudniinka* ....................................................................................23

Muhiimada kintirka ....................................................................................24

*Noocyada gudniinka gabdhaha* ....................................................................................26

*Da'adee lagu gudaa gabdhaha* ....................................................................................28

Farsama yaqaanada gudniinka Fircooniga ....................................................................................31

Qalabka loo adeegsado fulina gudniinka Fircoongia ....................................................................................32

*Dhibaatooyinka ay geystaan qalabkani* ....................................................................................32

*Qaliinka koowaad - xaalada ay ku sugan tahey marka la gudo* ...........32

*Xilliga guurka iyo foosha* ....................................................................................33

*Galmada iyo Fircooniga* ....................................................................................33

*Khataraha kale ee gudniinku keeno* ....................................................................................34

**CUTUBKA 4-AAD ....................................................................................35**

Halista uu fircooniga leeyahay ....................................................................................35

*Khataraha kale ee gudniinku keeno* ....................................................................................39

**CUTUBKA 5AAD ....................................................................................40**

*Waxa uu xalku noqon karo* ....................................................................................40

**CUTUBKA 6- AAD ....................................................................................42**

*Xigasho - gunaanad - tixraac* ....................................................................................42

Tixraac ....................................................................................43

Xigasho aruurinta shacab weynaha ....................................................................................44

# Hibeyn

Buuggaan waxaan u hibeeyey gabdhaha soomaaliyeed dal iyo dibadba ee gudniinka lagu sameeyay iyo guud ahaanba waddan walba oo looga dhaqmo fal-danbiyeedka gudniinka ee malaayinta gabdhood lagu naafeeyay.

Waxaan kaloo aan buuggaan u hibeeyey malaayinta dumar oo umulraacay, isku kor dhiig baxey, naftooda ku waayay ka dib markey ku dhacdey sakiintii dulmaneyd ee dhibaatooyinka culculus soo gaarsiiyay amaba iilka dhigtey. Waxaan kaloo buugan ku sharfayaa gabar kastoo gobaad falkaa lagula kacey, hadana aan is dhiggan oo aqbalin dulmigaa, balse bilowdey la dagaalankii iyo sidey u dabargoyn laheyd caadadan xun oo soo ji-reenka noqotey. Waxaan kaloo ku sharfayaa buugan waalid kasta oo ka badbaadiyay gabadhiisa ceebtaa iyo dhibkaa. Waxaan u hibeyey buugan ruux kasta oo ka hawlgalay in la joojiyo hab dhaqankan waxashnimada ah, ee lagu qashay hablaheenii, isla markaana gacan ka geystey in la jojiyo nidaamkan foosha xun. Waxaan kaloo u hibeynayaa buuggan in uu ka mid noqdo manhajka waxbarashada dalka, oo ardey walba iskuulada laga baro waxa uu gudniinka yahey, si ay iyagana isaga ilaaliyaan, jiilkooda dambana uga ilaaliyaan.

# Afeef

Waxaan ka afeefanayaa cidkasta oo u aragta ka hadalka arinta gudniinka qaasatan gudniinka Fircooniga in ay lid ku tahay dhaqankeena suuban iyo diinta. Marnaba igama aha in aan cid ku dulminayo ama ku dhibaatee-nayo, balse aan doonayo keliya in aan tilmaamo waxa xaqa uu yahay iyo waxa ay diintu ka qabto dhibkan. Cid kasta oo iga fikir duwan, una aragta tilmaanteyda iyo wax ka sheegga xumaanta gudniinka Fircooniga ah in aan diyaar u ahey in aan kala doodo, goob walba iyo goorkasta oo ay diyaar u yihiin. Waxaan mar kale ka afeefanayaa in ulajeedada buuggani uusan aheyn in cid lagu durayo ama lagu waxyeelanayo balse ay tahay oo keliya mid lagu saxayo dhaqan aan diinteena ku banaaneyn oo si khaldan inagu soo galay ayna muhiim tahey in laga saaro dhaqankeena. Habka keliya ee la isaga ciribtiri karo caadadan xun waxaan aamisanahey in ay tahey dhanka waxbarashada; Dowladduna ay mas`uuliyaddaa qaadato iyagoo la shaqeynaya xubnaha kala gedisan ee dadweynaha sida culimada, waalidiinta iyo ururadda bulshada.

**Ubah Abdullah Adan**
**Oslo, Norway**

# Hordhac

Buugan waxaa ku kooban macluumaad la soo koobey oo ku saabsan gudniinka gabdhaha guud ahaan, qaas-tan gudniinka Fircooniga; waxa uu yahey, waxa ay diinta ka qabto, halista uu leeyahey, waxa laga qaban ka-ro, iyo talo iyo tusaalooyin. Gudniinka gabdhaha, qaasatan nooca Fircooniga iyo la dagaalankii wax nagu cusub ma aha hadaan nahney bulshada Soomaaliyeed. Dagaalkii sokeeye ee Soomaaliya intuusan dhicin, xukuumadii waagaas jirtey ee Mohamed Siyad Barre waxyaalaha lagu xusi karo baa waxaa ka mid ah isku deyga ay isku deydey in la ciribtiro gudniinka gabdhaha. Waxaa la hirgeliyay olalayaal badan oo wacyigelin ah oo halista uu gudniinka leeyahey dadka looga digayo. Waxaa bilowdey dhaqdhaqaaq dumar oo xoogan oo suurtageliyay in la soo jeediyo sharci mamnuucaya ficilkaa. Inkastoo wax tirkoob ah laga sameyn, hadana waxaa la dhahaa caruurtii la dhaley wakhtigaa 80-yadii waxey u badnaayeen kuwo ka badbaadey gudniin qaasatan kan Fircooniga oo aan u bixiyay `Wad Haween`.

Mudadaa gaaban ee ay xukuumadii hore la dagaalantey caadadan oo guul aan waarin laga gaarey, wuxuu ficilkaa tusaale fiican u noqonayaa in maantey loo baahan yahey xukuumad horyaal u noqota la dagaalanka iyo ciribtirka caadadan waxuushnimada ku saleysan oo soo jireenka ku noqotey dhaqankeena. Ilaa iyo hada la dagaalanka dhibkan iyo wacyi gelinta halista uu leeyahey waxey noqotey howl ay bulshada rayidhka ah iyo ururada iskaa wax u qabso ah ay aad uga shaqeeyeen, culimadana, in kooban kala shaqeysey.

Waxaa la ogyahey ummad walbaa oo aan dhaqanka xun iska reebin, in ay sumcad xumo u keento, caafimad darana la jaal noqdaan. Sidaa darteed, waa nagu waajib in aan isku meel uga soo wada jeesano la dagaalanka halistan naafeysey gabdhaheena iyo hooyooyinkeena, kuna reebeyna xanuun lagama bogsoodaan ah.

Waxaan u arkaa in buuggan maantey muhiim iyo munaasib weyn u yahey sidii lagu ciribtiri lahaa caadadan dilaaga noqotey. Tan koowaad, waa in laysla fahansan yahey waxa uu gudniinka dumarka uu yahey iyo waxa ay diintu ka qabto. Fahankaa markuu yimaado waxey sahleysaa, in baahida labaad loo gudbo, oo ah sidee la isaga deyn karaa cadaadan. Baahidaa xal raadis markey dhalato waxaa qasab noqon in ay dowlada mas`uuliyadeed qaado oo ay ficil la timaado. Waana waxa aan ka rajeyn in uu buugan kaamilo. Dad yaqaan waxa dhibaya, qirsan dhibkood, xalka meeshuu ku jiro wey heli og yihiin.

# Mahadnaq

Waxaan marka koowaad u mahadnaqayaa Allaah Subxaanahu Wa Tacaala oo ii suurta geliyay in aan howshan sameynteeda ku dhiirado. Waa markii iigu horeysey ee aan buug qoro. Intaan qoritaanka buugga ku dhex jirey ayaan ka war heley in uu buuggan noqon doono buuggii ugu horeeyey ee gudniinka ka hadlayo oo af somali ku qoran. Mawduucan gudniinka marar badan ayaa laga hadley, laakiin luuqadooyin kala oo aan luuqada af soomaaliga aheyn ayaa lagu soo bandhigey. Ogaanshahaa qiimaha uu u yeelan karo buuggan bulshada, waxey igu abuurtey dheeragelin iyo mas`uuliyad dheeraad ah sidaan buuggan uga dhigi lahaa mid faa`iido waarta u keeno bulshada. Alle ka dib, waxaan u mahadnaqayaa qof kasta oo iga caawiyay buuggan, hadey noqoto talo bixin, xigasho raadin, saxid iyo la tashi. Waxaan marka koowaad u mahadnaqayaa caruurteyda Yasmin, Mohamed iyo Ilyas oo fahan, dulqaad iyo garasho ka da` weyn cimrigood iigu deeqey intaan howshan ku dhex jirey. Waa abaal aan weligey gudi karin. Waxaan ahey waalid mas`uuliyadiisu labo jibaaran tahey (taas oo aan ulajeedo marka aad ku korineyso caruur qurbaha, hadana aad mas`uuliyadaa keli ku tahey aad bey u cabsi iyo culeys badan tahey), waxaan kaloo ahey xamaalato laga rabo in ay maalin walbaa ugu yaraan 8 saac shaqeyso. Waxaan ahey hooyo howlaheedu badan yihiin, badnaanshahaana uu ku yimid rabitaan, balse wakhti badan oo iga gala howlahaa ayaa ah wakhti aan ka soo go`ynayo wakhtigii dhalaankeyga. Waxey ii sahleen sidaan waalidnimadeyda ku gudan karo hadana hamigeyga ku gaari karo. Sidaa darteed baan abaal aan la koobi karin u hayaa dhalaankaa Rabi iigu deeqey. Ilaah ha ii kiin dhawro. Waxaan kaloo aad iyo aad u mahadnaqi Kudun Muse iyo Guled Gilingil oo aad iiga caawiyay buuggan, qaasatan Kudun oo farsameynta buugga lahaa. Waxaan u mahadnaqayaa hooyadey Raho Abdi Hassan oo aan ka heley taariikho badan oo ku saabsan siduu gudniinka iyo hab dhaqameedku ahaan jirey wakhtigeedii iyo wakhtigii hooyadeed. Ka warhelida taariikhdaa aqoon dheeraad ah baa iiga korortey, isla markaana waxey aheyd niyad jab sida aysan weli bulshada ugu baraarugin dhibka ay leedahey caadadan. Rafaadkii iyo silicii ay labadaa jiil, hooyadey iyo hooyadeed ay soo mareen, weli gabdhaheena oo qarnigan jooga isku rafaadkaa iyo dhibabkaa ayay iyagana la kulmaan. Taa waxey kuu cadeyneysaa in horumarka bulshada, dhan walbaba uu aad u liito. Waa ciil aan daawo laheyn Cutubka diinta wadaadado badan oo kala tashteyna aad baan uga mahadnaqayaa aqoonta iiga korordhey iyo samirka iyo wakhtiga ay ii hureen, iyagoo aan awoodaa laheyn. Cutubyada cutub ka mid ah baan ugu tala galey in aan ku qiimeeyo oo ku xuso qaar ka mid ah halyeeyada soomaaliyeed oo saameeno kala gedisan ku yeeshey bulshadaha ay la nool yihiin, qeyb weyna ka soo qaatey la dagaalanka gudniinka. Waxaan isku soo aruuriyay xigasho ku saleysan fikradooda iyo sidey u arkaan in lagu cirib tiri karo gudniinka gabdhaha.

Walaalahaa qiimaha badan oo dal iyo dibad ku kala sugan aad iyo aad baan uga mahadnaqayaa dadaalka iyo wada shaqeynta na dhex martey. Jazakallah dhamaantiin. Waxaan aakhirkii u mahadnaqayaa qoraaga buuga `Firsooca Sarbeebta` Maxamed Warsame Hiraabey oo ii suurta geliyay in uu iga saxo buuggan, dhanka luuqada. Luqman Yasin Gelle oo ah aas-aasaha iyo madaxa sare ee Rugta Qorayaasha Soomaaliyeed (Chamber of Somali Writers) oo dib u fiirinta labaad ee buugga iga caawiyay iyo Dr. Ahmed Abdirahman Herzi oo sannadkii 2014 shahaadadiisa PDH ka diyaariyay xaaladda gudniinka Puntland. Dr Ahmed ahna Wasiirka ku xigeenka Shaqada, Shaqaalaha Dhalinyarada iyo Ciraayaha ee Puntland, ayaa iga kaalmeeyay in qeybo ka mid ah cutubka 4-aad uu luuqadd ahaan iga saxo. Dhamaantiin abaal aan la koobi karin ayaan idiin hayaa, waana idinkaga mahadnaqayaa wakhtiga iyo wanaaga. Diinteena Islamka ayaa sheegeysa in ay jiraan saddex camal oo ajarkoodu waaro dhimasho ka dib. Saddex camal ayaa kala ah (1) qofkii geed talaala oo geedkaas uu noqdo mid noolaha Alle (dad iyo dugaag) ay faa`iido ka helaan, hadey noqoto ka dugaalid qorax roob, dabeyl iwm. (2) qofkii dhisaa masaajid ama ka qeyb qaata dhisid masaajid, iyadana waa ajar aan dhamaan iyo (3) qofkii bara aqoon qof kale ama wax wanaagsan oo anfac u yeesha nolasha qofkaa, waa ajar aan dhamaan. Rabiyoow nooga dhig buuggan mid kheyrkiisa waara oo aqoon iyo faa`iido dheeraad ah ku soo kordhiyo bulshada. Intii qof oo suurtagelisey buuggan ajar waara Alle ka siiyo.

# Dulmarka Buugga

***Cutubka 1-aad:- Taariikhda gudniinka Fircooniga***

Cutubkani waxa uu ka hadlayaa asal ahaan halka uu ka soo jeedo gudniinka Fircooniga, asbaabaha uu ku yimid, sheeko iyo shaahid waxa dhaliyay, degaamadii ugu horeyey ee uu ka hirgaley dhaqankan iyo sida uu ugu baahay dunida inteeda kale. Waxaa kale ee uu cutubku iftiimin doonaa waddamada lagaga dhaqmo cadooyinkaas iyo sidey u isticmaalaan, heerka uu ka gaarsiisan yahay, sababaha loo isticmaalo iyo waxa ay dadku isugu dhejinayaan caadadan halista ah.

***Cutubka 2-aad:- Diinta iyo gudniinka dumarka***

Diinta maxey ka qabtaa gudniinka dumarka guud ahaan? Gudniinka Fircooniga ah asal ma ku leeyahey diinta suuban ee Islaamka? Maxay diintu ka qabtaa? Ma banaan tahay in gabdhaha la gudo? Ma waajib baa? Ma xaaraan baa, Ma xalaal baa? Sidee diintu u aragtaa gudniinka gabdhaha? Su’aalahaas iyo qaar kale ayaan cutubkaan ku eegi doono. Qaybta danbe ee cutubku wuxuu kaa shaafin doonaa waxay diintu ka qabto caadaadan soo jireenka ah ee ku dhex milantay diinteena. Cutubkan wuxuu kuu soo bandhigi doona mowqifka adag ee ay ka taagan yihiin culimadu in falkan lagu sameeyo, qof muslim ah iyo waxa ay noqon doonto ciqaabta uu yeelan doono cidda falkaasi samaysa, cidda ka qeyb qaadata iyo cidda qorsheysaba. Wuxuu cutubkani kaa haqabtiri doonaa dhamaan qaybaha kala duwan ee khuseeya diinta, ilaalinta xaquuqda qofka, iyo ayaadaha Qur`aanka ee tilmaamayaa ilaalinta qofka iyo weliba xadiisyada tilmaamaya arimahaasi oo idil.

**Cutubka 3-aad: - Gudniinka Fircooniga iyo noocyada uu ka kooban yahey**

Cutubkani waxaa uu si guud iyo si gaar ah u faafaahinayaa dhab ahaan waxaa uu gudniinka Fircoonigu yahay, (noocyadiisa kala duwan, cidda fulisa dulmigaasi, qalabka loo isticmaalo iyo weliba da`da la gudo hablaha). Cutubku waxaa uu si gundheer uga waramayaa heerarka kala duwan ee hawshaasi marto, xanuunka iyo dhibka faraha badan ee laga dhaxlo fulinta xubin jarida gabadha.

Cutubkani waxaan ku soo qaatey oo aad ka heli doontaa fariimo iyo tusaalayaal ay ila wadaageen gabdho dhibkaa gudniin ku dhacey, iyagoo ay ulajeedadoodu ay aheyd u digid iyo aqoon is weydaarsi.

**Cutubka 4-aad: - Halista uu gudniinka Fircooniga sababo**

Cutubkani wuxuu ka waramayaa caqabadaha gudniinka laga dhaxlo waxa ay yihiin, saameynta ay ku yeeshaan gabdhaha hadey noqoto xag qalbi, xag jismi, iyo xagg dareenba. Waxaa kale ee uu cutubku tilmaamayaa sababaha keenay in weli gudniinka Fircooniga lagu dhaqmo oo uu dabar go'i la`yahey iyadoo hadana laga wada dharagsan yahey dhibaatooyinka caafimaad ee uu leeyahay.

**Cutubka 5-aad: - Waxa uu xalku noqon karo**

Waxaa cutubkan soo dhiraandhirin waxa uu xalku noqon karo, meesha uu xalku ku jiro iyo waddamada qaarkood sidey uga soo tilaabsadeen dhibkaa. Xalka ay isticmaaleen iyo natiijada laga gaarey. Cutubkani waxuu noqon talo bixin.

**Cutubka 6-aad: - Xigasho - Gunaanud - Tixraac**

Cutubkan waa gunaanadka buugga oo waxaan ku soo bandhigayaa talooyin sahlaya soo af-jaridda halistan aafeysatey hableena soomaaliyeed. Waxa kale oo cutubkan ku soo aruuriney fikrado iyo xigasho kala gedisan oo laga soo xigtey hoyaalada dumarka qaarkood, dal iyo dibadba. Qoraal kasta oo macno weyn ku fadhiya wuxuu kaa doonayaa in aad xigasho sameyso si qoraalku u noqdo mid faa`iido u leh bulshada loogu talagaley in ay wax ka qaataan. Hadaba aniga oo taasi ka duulaya ayaan qoraalada aan ku soo xigtey buuggan tixraacooda cutubkan isugu soo aruuriyay.

# CUTUBKA 1-AAD
# TAARIIKHDA GUDNIINKA FIRCOONIGA

Taariikhda uu gudniinka Fircooniga ah bilowdey, sida uu ku bilowdey iyo meeshuu ka bilowdey waa taariikh aan la isku raacsaneyn. Balse aqoonyahannada arrintan wax ka qorey ayaa ku tilmaama in gudniinka fircooniga uu ka soo jeedo qaaradda Afrika. Waxaa la sheegaa in ay tahey caado bilaabatey horaantii qarnigii afaraad ilaa shanaad ka hor diinta masiixa. Sidaa darteed baa loo yiraahdaa gudniinka Fircooniga waa caado da` weyn oo soo jirtey ka hor diinta islaamka iyo tan masiixiga. Taariikh ahaan waxaa la sheegaa in gudniinku uu ka soo jeedo dadkii degi jiray Masar oo ahaa dad lagu yiqiin ilbaxnimo iyo taariikh dheer. Oo uu ka soo bilowday wakhtigii Faraaciinta Masar, ka dib markii reer Bani-israa'il oo wakhtigaas la gumeysan jirey nin faalalow ahi u sheegay boqorkii xilligaas in talada uu kala wareegi doono wiil ka dhalan doona dadka ay gumeystaan. Dabadeedna waxaa amar lagu bixiyey in la gudo oo la tolo dhammaan haweenka. Si gabar kastaa oo foolaneysa ay ugu dhasho isbitaal, loona ogaado waxa ay dhashey. Sidaa darteed ayaa lagu tilmaamaa in gudniinka sidaa ku bilowdey. Gudniinka wuxuu sidaa ku noqdey wax ay faraaciintii hore dadka ku khasbi jireen, gaar ahaan casrigii Ramsiis oo ahaa kun sano ka hor dhallashadii Nabi Ciise (NNKH). Waraaqo ay leeyihiin Giriiggii hore oo taariikhdoodu lagu qiyaaso 163 sano ka hor bilowgii taariikhda miilaadiga (dhallashadii Nabi Ciise (CS)) ayaa sheegaya in gabdhaha masaarida ah lagu sameyn jirey gudniinka Fircooniga. Taa waxey tilmaameysaa in gudniinka asalkiisa uu ka yimid dalka Masar iyo dooxada Niil wakhtigii Faraacinta. Sidoo kale waxaa jira caddeymo laga helay meydadki Faraacinta[1] oo muujinaya inuu jiray gudniinka gabdhaha noocyada kowaad iyo saddexaad, oo aynu ku arki doono cutubka sadexaad ee buugga. Ganacsigii iyo is dhexgalkii dadka dhex marey iyo weliba faafidii diinta Islaamka waxey sii sahashey in caadadan dallal kale ay ku sii fiddo. Maanta waxaa lagu tilmaamaa in adduunka ay jiraan ilaa soddon dal oo ku dhaqma caadadan, oo ka soo kala jeeda qaaradda Afrika, Bariga Dhexe, Indoniisiya iyo Malaysiya.

## Wadamada laga isticmaalo gudniinka Fircooniga.

Waddamada ku dhaqma caadadan waxa ugu horeeya masaarida oo lagu tilmaamo in ay yihiin meeshii ay ka soo bilaabatey caadadan. Waxaa kaloo la mid ah dalalka ay ka mid yihiin Soomaaliya, Waqooyiga

Suudaan,[2] Jabuuti, Maali, Siraaliyoon iyo Geni oo gudniinkoodu marayo 90 %. Inkastoo sanadihii u dambeeyay dalalka qaarkood uu hoos u dhac ku yimid hadana waxaa lagu tilmaamaa in dalalka ay ka mid yihiin Masar,[3]Suudan iyo Niger[4] uu weli dhaqankaa aad ugu xoog badan yahay, oo sadexdii gabdhood oo dhulalkaa ka soo jeedo, labo ka mid ah waxaa lagu tilmaamaa in ay yihiin gabdho la gudey.Ku baahsanaanta iyo isticmaalida caadadan iyadoo lagu kala gedisan yahey ayaa hadana dalalka ugu badan ku dhaqanka caadadan waxaa ka mid ah dalka Eratereeya oo gudniinka dumar uu marayo boqolkiiba 88 %, halka Itoobiya uu gudniinka marayay boqolkiiba 56 % sannadkii 1997, laakiin shantii sanno ee u dambeysey ay guul weyn ka gaareen la dagaalanka caadadaa oo isticmaalka gudniiinka uu hoos u dhac ilaa boqolkiiba 31% [5]

---

1 - Sababaha iyo ujeedooyinka ku saabsan gudniinka Fircooniga, 2013
https://www.28toomany.org/blog/what-are-the-origins-and-reasons-for-fgm-blog-by-28-too-manys-research-coordinator/

2 - Warbixinta 13/2011 - NORAD
Gudniinka Fircooniga, Maxaa dhacay iyo maxay Noorway qabanaysaa?
https://norad.no/globalassets/import-2162015-80434-am/www.norad.no-ny/filarkiv/vedlegg-til-publikasjoner/kjonnslemlesting--hva-skjer-og-hva-gjor-norge.pdf

Hoos u dhacaa waxaa sabab u ahaa wada shaqeyn dhex martey culimadooda diinta kuwa misiixiga iyo kuwa muslimiinta oo si wadajir ah isku meel uga soo wada jeestey la dagalaanka gudniinka. Keenya waxuu gudniinku ka marayay boqolkiiba 32 % sannadkii 2003, laakiin sannadkii 2007 waxey gaareen hoos u dhac ilaa boqolkiiba 27 %  oo sabab looga dhigo sharciyada gudniinka dalkaa ka jira iyo wacyigelinta nidaameysan oo laga hirgeliyay. Senegal boqolkiiba 28% ayuu gudniinka ka marayaa halkaTanzania boqolkiiba 14 % uu ka marayo gudniinka. Dalalkaa waxey ka mid yihiin 30-ka dal ee ku dhaqma caadadan Soomaaliya[6]waxey ka mid tahey dalalka istcimaala gudniinka halista, nooca loo yaqaan `Fircooniga`ama FGM. Noocyada gudniinka iyo sidey u kala halis badan yihiin ayaad ka akhrisan doontaa cutubka 3-aad. Tirakoob ay soo bandhigtey hay`adda Unicef, 2016[7]oo ah hay`ad caalami oo xoojisa illaalinta xaquuqda ilmaha, ayaa tirakoobkeeda ku soo gudbisey in Soomaaliya uu gudniinka Fircooniga aad ugu badan yahey, oo boqolkiiba 98 (98%) gabdhahaha soomaalida la gudey, halka Yugaandha uu tirakoobkoodu marayo in boqolkiiba labo (2%) ka mid ah gabdhahoodu gudan yihiin.  In kastoo uu dhaqankan yahey wax ku badan Qaarada Afrika, hadana waxaa la arkey in ay caadadan ku fidey oo looga dhaqmaa dalal ay ka mid yihiin Bariga Dhexe, Kurdida la degta Iiraan iyo Ciraaq, Malaysia iyo Indonesia. Hay`adda Caafimaadka ee Aduunka WHO waxay ku qiyaastay in caadadan looga dhaqmo oo lagu arkey ilaa dalal gaaraya 30 dal.[8] Sawirka hoose waxa uu muujinayaa dalalka ugu badan ee isticmaala gudniinka fircooniga ah - Unicef data 2004-15:



[9]

---

3 - Fiditaanka gudniinka fircooniga ee dumarka masaarida, Hay`ada caafimaadka WHO https://www.who.int/bulletin/volumes/86/4/07-042093/en/

4 - Tirakoobyo muujinaya baahsanaanta gudniinka fircooniga ah ee 29ka dal ku dhaqma caadadaa, Unicef - file:///C:/Users/uab/Downloads/00-FMGC_infographiclow-res%20(2).pdf

5 - Warsi Wargeys - Ethiopia: Hoos u dhac ku yimid gudniinka dumarka, Joornaalka Bistandsaktuelt, 2019 https://bistandsaktuelt.no/nyheter/2019/intervju-med-kidist-belayneh-etiopia-om-kvinnelig-omskjaring-fgm/

6 -  Warbixin ku saabsan gudniinka fircooniga ee laga sameeyay Suudaan iyo Soomaaliya, 2008 - Norwegian Landinfo file:///C:/Users/uab/Downloads/764_1.pdf

7 - Tirakoob cusub, ee hay`ada UNICEF oo muujineysa  in waxyeelada gudniinka fircooiga oo noqdey welwel caalami ah - 2016 https://www.unicef.org/media/media_90033.html

8 -  Faafida gudniinka Fircooniga, Warbixin WHO, 2013 https://www.who.int/reproductivehealth/topics/fgm/prevalence/en/

9 -  Dumarka ku nool Soomaaliya baa 98% lagu sameeyay naafeynta xubinta taranka - Unicef https://qz.com/610930/unicef-98-of-women-in-somalia-have-undergone-female-genital-mutilation/

## Sida uu gudniinka Fircooniga ugu baahey dunida

Hay'adda u doodda xuquuqda aadanaha ee Amnesty International waxay ku qiyaastay in ka badan 130 malyan[10] oo gabdho in lagu sameeyay nooc ka mid ah noocyada gudniinka. Halka in ka badan 3 malyan oo kale ay halis ugu jiraan sanad walba in la gudo.

Qaaradda Afrika oo ah meesha ugu badan ee looga dhaqmo caadada gudniinka gabdhaha, haddana ah meeshii uu ka soo bilowday Wad Haween, (gudniinka fircooniga) ayaa lagu qiyaasaa ku dhawaad 92 malyan[11] oo gabdho da'doodu tahay 10 jiro iyo ka badan in la gudey, sidaa laga soo xigtey hay'adda Caafimaadka Adduunka, WHO. Dalalka ugu badan ee caalamka ee looga dhaqmo gudniinka gabdhaha waxaa ka mid ah Masar, Suudaan, Itoobiya iyo Maali, Halka Soomaaliya iyo Jabuuti ay ku jiraan dalalka xad dhaafka looga isticmaalo nooca gudniinka halista ah ee loo yaqaan Fircooni.

Gudniinka gabdhaha waxaa ku dhaqma bulshooyin kala caqiidooyin gedisan, gaal iyo muslimba isugu jirra, siyaabooyin kala gedisan ay ugu dhaqmaan. Bulshooyinka qaarkood waxey isticmaalaan nooca 1-aad & 2-aad, oo ay ugu yeeraan nooca fudud oo sunni loo yaqaan. Dadka ku dhaqma noocaa waxey u badan yihiin dadka ka soo jeeda carabta, afrikaanka iyo dadka dega dhulka xeebaha Yemen, iyo qaar deggan deegaanno ka tirsan Indoniisiya.

## Tirokoobka gudniinka Fircooniga ee dunida

In kastoo caalamka looga aqoonsadey in gudniinka Fircooniga uu yahey xad-gudub xaga xuquuqul insaaniga,[12] hadana tirakoobka gudniinka Fircooniga ee ka jira dunida baa lagu qiyaasaa in ka badan 200 oo malyan[13] oo gabdho iyo haween oo la gudey oo dhaawacaa  dhibkaa la nool maanta. Caadadaa gudniinka Fircooniga waxaa ku dhaqma sidaan horey usoo sheegey ilaa 30 dal oo ku kala baahsan saddex qaaradood. Qaaradda Afrika waa qaaradda ugu badan ee laga fuliyo halistan. Waddamada ku dhaqma caadadaa waxaa laga xusi karaa Soomaaliya,[14] Itoobiya, Nayjeeriya iyo Masar. Waxaa la qiyaasaa in dunida oo dhan halkii daqiiqo la gudo[15] gabar ka yar afar jir, sanadkiina ay gaarayaan 20 malyan oo gabdhood oo la guday. Waxaa kaloo dhawaan la arkey in gudniinka uu ku soo badanayo dalalka qurbaha ee soo galootiga aqbaley sida Yurub,[16] USA, Canada, New Zealand iyo Australia.

---

10 - Warbixin iyo baahidada gudniinka fircooniga - Wasaaradda arrimaha dibedda norway
file:///C:/Users/uab/Downloads/lemlestelse_e.cleaned.pdf

11 - Gudniinka fircooniga (FGM), https://www.who.int/reproductivehealth/topics/fgm/prevalence/en/ - WHO- Ururka caafimaadka adduunka ee WHO og Unicef 2013

12 - Bayaan caalami ah oo lagu aqoonsadey halista uu gudniinka fircooniga leeyahey, laguna cirib tirayo. OHCHR, UNAIDS, UNDP, UNECA, UNESCO, UNFPA, UNHCR, UNICEF, UNIFEM, WHO
file:///C:/Users/uab/Downloads/9789241596442_eng.cleaned.pdf

13 - FGM oo loo aqoonsadey xad gudub xaquuqda bini`aadamka, - Unicef, 2017
https://www.unicef.org/protection/female-genital-mutilation

Soddonka dal ee ku dhaqma caadadan, shan iyo tobon ka mid ah wax horumar ah kama aysan gaarin la dagaalka iyo ciribtirka caadadan soo jireenka noqotey. Halka afar iyo toban ka mid ah dalalkaa sida Masar, Kenya, Siraa-Liyoon ay guul weynka gaareen la dagaalanka gudniinka. Dalalka ay ka mid yihiin Kenya, Jamhuuriyadda Bartamaha Afrika, Tansaaniya, Benin, Ghana iyo Cameroon waxey qarka u saaran yihiin ku guuleysigga ciribtirka gudniinka. Sideed iyo toban dalalkaa ka mid ah sida  Burkina Faso, Kenya, Tansaniya, Masar, Ereteriya, Itoobiya, Jabuuti, Senegal, Gana, Jaad, waxay meel mariyeen sharciyo lagu ciqaabayo gudniinka Fircooniga ah, xukunkuna u dhexeeyo ugu yaraan saddex bilood ilaa abadiyan xabsi ah. Waddammo badan ayaa sidoo kale soo rogey ganaax lacageed.[17] Wadammadda horumaray ee aduunka oo soo galootiga ku badan yahey, ayaa labo iyo toban ka mid ah sida Norway, Denmark, Itaaliya, Spain, Boqortooyada Ingiriiska, Canada, Biljim ayaa soo dejiyay sharciyo ciqaabaya dhaqankaa gudniinka.[18]

Dalalka ku dhaqma caadada gudniinka dumarka intooda badan waxey heystaan xog iyo diiwaan gelin qaran oo sheegeysa heerka uu marayo gudniinka dalkooda. Dalalkaa intooda badanna waxey hadana heystaan sharciyo mamnuucaya gudniinka. Dalka Soomaaliya u maleyn maayo in ay heystaan diiwaangelin qarameysan oo muujineysa heerka uu gaarsiisan yahey gudniinka.  Meeqo gabdhood ayaa sanadkii la gudaa? Meeqa ayaa u dhimatey halistaa? Higelinta sharciga mamnuucaya gudniinka awood intee ayuu le`eg yahay? Waa maxey ciqaabta la marmarsiiyo dadka ku dhaqma caadadaa?. Macluumaadka iyo ka badan waxaa heli lahaa hadii ay xukuumadda mas`uuliyad iska saari laheyd la dagaalanka halistan. Aqoon iyo xirfad weyna bulshada ayaa uga soo kordhi laheyd. Warbixinadda, si guud ahaan ah waxaa bixiya bulshada caalamka.

Inkastoo isticmaalkii gudniinka la leeyahey hoos ayuu u dhacey, hadana waa muhiim in aan la hilmaamin gabdhihii la gudey iyo dhibka ay ka dhaxleen waxashnimadaa, oo ku noqotey dhib iyo dhaawac lagama bogsadaan ah. Ka hortegidda dhibkaa iyadoo ay muhiim tahey, in awoodda la saaro, ayay hadana muhiim tahey in qorshaha lagu daro daryeelka iyo ka warheynta gabdhihii iyo hooyooyinkii dhibkaa loo geystey oo daruufooyin kala gedisan ku sugan una baahnaan karaan kaalmo caafimaad.

---

14 - Dalalka FGM ku dhaqma,- Unicef,
https://www.unicef.org/protection/files/00-FMGC_infographiclow-res.pdf

15 - Tirakoob iyo aragtida dadka ee ku saleysan gudniinka fircooniga, 2015- UNFPA
file:///C:/Users/uab/Downloads/19961027123_UN_Demograhics_v3%20(1).pdf

16 - Gudniinka Yurubka lagu arkey, Europakommisjonen - https://ec.europa.eu/info/policies/justice-and-fundamental-rights/gender-equality/gender-based-violence/eliminating-female-genital-mutilation_en

17 - Mamnuucitaan Gudniinka Fircooniga iyo sharciya adduunka oo dhan
Xaqiiq aruurin, 2008
https://reproductiverights.org/document/female-genital-mutilation-fgm-legal-prohibitions-worldwide

18 - Mamnuucitaan sharciyeede gudniinka gabdhaha ee aduunka ka jira, 2008
https://reproductiverights.org/document/female-genital-mutilation-fgm-legal-prohibitions-worldwide

# Hanaan dhaqameedka Soomaalida ee ku aadan gudniinka Fircooniga

Markii koowaad ee aan doorashadda Maamulka Golaha Degaanka Oslo ku guuleystey 2011, ayaan hadana jaanis u heley in aan ka mid noqdo gudigga dumar ee xisbigga Shaqaalaha ee aan ka tirsanahey, xaruntiisuna Barlamaanka aheyd. Gudigaa ayaa ka dooda arimaha haweenka caalamka la soo gudboonaado. Dhawr jeer ayaa halkaa lagu soo qaadey carqaladaha ay la kulmaan dumarka Afrika hadey noqoto ka qeyb qaadashada nabada iyo siyaasada, helitaanka kheyraadka iyo xaquuq loo siman yahey. Maalin baa la iga codsadey in aan ka hadlo xaaladda dumarka ee gudniinka ee Soomaaliya meesha uu marayo. Macluumaadkii aan maalintaa soo bandhigey waan xasuustaa waxey ahaayeen macluumaad aan meelo kala gedisan ka soo aruuriyay, ee ma aheyn macluumaad aan toos uga heley dalkii ama dadkii ay arintaa quseysey. Maadaama dalkii mudo dheer iigu dambeysey, waxaa aan ka hadlayo ama ku doodayo waxay ahaayeen wax aan akhristey, maqley ama la ii sheegey. waxaan maalintaa go`aansadey in aan xaqiiqda dhabta ah salkeeda raadiyo oo waxaan u baahnahey si toos ah uga helo dalka iyo dadka ay quseyso. Fasax asbuuc ah ayaan shaqada ka qaatey oo dalkii dib ugu soo laabtey.

Meesha keliya ee aan dalka ka aqaaney waxey aheyd Moqdisho, waa meeshii aan ku dhashey, ku barbaarey, kana soo qaxey. Nabadgelyada oo xumeyd darteed iima suurtagelin in aan Moqdisho imaado, waxaan xaqiiq raadin u aadey Puntland oo aan weligey tegin, balse ah degaanka waalidkey. Asbuuc ayaan halkaa joogey oo aad iyo aad uga soo helay. Degaan nabad ah, oo u baahan dugaal iyo geedo badan in lagu abuuro dadkiisuna marti gelinta ku fiican.

Mudaddii koobneyd ee aan halkaa joogey waxaa ii suurta gashey in aan booqdo iskuulo, rugaha caafimaadka, xeryaha qaxootiga iyo meelaha dhalinyarada xirfadaha shaqo lagu baro. Waxaan aad uga soo heley barxadii Goldogob oo hawlo badan lagu qabsan jirey. Galinka hore waxey ahaan jirtey meel geela laga waraabiyo, gelinka dambana waxey aheyd gariinka kubadda cagta. Mudadaa gaaban dadkii iyo degaankii ayaan si fiican u kala bartey. Waxyaalaha dhibtaa oo aan soo arkay waxaa ka mid ahaa waxbarashada oo lacag ku xirnayd. Ilaa galaaska 4-aad waxbarashada lacag la`aan ayay aheyd, balse wixii intaa ka dambeeya haduu ilamaha sii wadanayo waxbarashada waxaa ka xigtey in ardayga bishiiba laga bixiyo 10$. Hadda garan maayo sida ay xaaladdu tahay. Waagaa, inta badan wiilashaa waxbarashada sii wadan jirey. Halka, gabadha aan reerkoodu awoodin ka hari jirtey waxbarshada waxii ka dambeeya galaaska 4aad. Waxaan galab is raacnay, dhawr dumara oo i yiri isbitaalka baa lagu soo tusi.

Intaan waddada sii soconney baan waxyaalaha aan ka wada sheekeysannay baa waxaa ka mid ahayd gudniinka gabdhaha iyo dhibaatada uu leeyahay. Mid ka mid ahayd dumarkii baa i weydiisay in aan hooyo ahay iyo inta caruur Ilaah i siiyey. Markaan u jawaabey bey tiri, ”gabadhaada ma guddey”. Markaa baan ku iri ”maya”. Haweentii intay hal mar i hor istaagtay, oo dhexda qabsatay oo anagii oo dhan na istaajisey, bay tiri ”baloo oo yaa cunaya neefkay gawracdo”. Anna intaan qoslay, oo gartay waxay ka waddo, baan ugu jawaabay ”oo ma ayadaa u baahanba in ay neef gawracdo, suuqa ayay ka soo gadan kartaa isagoo diyaarsane”. Intay dhoolacadaysay, madaxa ruxday sidii quusasho oo kale iyo in aan qalad sameeyey bey tiri ”dadkiinaan dibadaha nooga imanaya, qurun baad noo soo waddaan”. Sheekadeenii iyadoo aan noo dhammaan baan isbitaalkii nimid oo meeshii ka sii wadney hadalkii.

Gabadhii isbitaalka ka mas`uulka ahayd oo umuliso ahayd baa isku dayday in ay u sharaxdo hooyadaa waxa uu gudniinka Fircooniga uu yahay iyo halista uu u leeyahey gabadha.

Waxey xataa tusaalooyin u soo qaadatey gabdho isku umulraacey gudniin dartii. Balse hooyadii fikradeedii ayay ku adkaysatay, difaaceediina wuxuu noqdey oo `yaa guursan gabadha aan la gudin, hadii gabdhihii kalana la gudayo. Ma faceed baad ka reebeysaa`? Hadalkaa ay hooyadaa tiri aad buu ii taabtay. Waa dulucda sheekada in aan la dhayalsan awooda ay leedahey caado dhaqameedka bulshada iyo filashooyinka ay leedahey. Hooyadaa hadday jaanis waxbarasho iyo wacyi gelin ay heli lahayd, waxaan hubaa in aysan noqoteen caado-raac dhayalsata xaquuqda iyo jiritaanka gabadheeda.

Isticmaalka iyo ku dhaqanka noocyada kala geddisan ee uu gudniinku ka koobanyahey, dadka Soomaaliyeed aad bay ugu kala fikrad geddisan yihiin. Kala gedisnaanshahaa fikrad waxaan sabab uga dhigi karaa maqnaanshaha ama helitaanka iyo buuxinta baahida aasaasiga ah ee bini'aadanka u baahan yahey sida helitaanka amniga, cuntada, biyaha, waxbarashada, caafimaadka, dhaqaalaha iwm. Maqnaanshaha baahidaa aasaasiga ah ee dalka ka jira waxaa sabab looga dhigaa dagaalkii sokeeye ee Soomaaliya ka dhacey. Baahidaa aasaasiga ah markay ka maqan tahay muwaadinka isla markaana aysan jirin hay`ado iyo awood dawladnnimo ee dhawraya oo ilaalinaya xaquuqda iyo baahida muwaadanka, dhaqanka Soomaaliduna uu yahey dhaqan ku salaysan reer guuraannimo iyo nidaam abtarsiinyo oo ragga la qiimeeyo, gabadhana la liido. Daruufahaa kala gedisan waxey sahleysaa in la aqbalo wax aan la aqbali jirin, iyo in la caadeysto wax aan la caadeysan jirin. Tusaale ahaan, hooyada aan waxbarasho helin, ku dhex nool degaan aan horumarsanayn, waxbarasho jirin, baahiyooyinkii aasaasiga aan la haysan, daruufahaa nololadeed aawadood waxey hooyadaa ku qabeysaa in ay gabadheeda u koriso nin, ninkii berri guursan lahaa oo masruufi lahaa.

Kaaga sii daranee, haddii haddana degaanka laga aamisan yahey gudniinka toltolida oo gabadhii aan la Fircooneyn aysan daahir iyo nadiif aheyn. Hooyadaa xaaladaa ku sugan, jaanis kalana aysan heysan waa ku qasab in ay adeecdo oo ay u hogaansanaato dhaqankaa, hadii kale waxaa halis iyo mugdi geli kara helitaanka guur iyo mustaqbalka gabadheeda. Hooyadaasi hadday xataa ogtahay halista uu leeyahay gudniinka ama aysan ula rabin gabadheeda gudniinkaa, waxay adoon u tahay daruufaha saboolinimo iyo jaahilnimo ee ka jira degankaa. Kuna qasbaya inay adeecdo waxa aan damiirkeed yeeleyn oo halis gelinkara jiritaanka gabadheeda.

Buuxinta iyo helitaanka baahiyaha aasaasiga ah iyadoo ay isbeddel samayn karto baa haddana isbedelkaa waxaa sii xoojiya marka ay jiraan sharciyo mamnuucaya ficilkaa oo hadana ciqaabeenaya cidii ku dhiirata ficilkaa. Dalal badan oo Soomaalida qurbaha ku nool ayaa waxaa ka jira sharciyo mamnuucayo gudniinka gabdhaha nooc kasta uu yahay. Qofkii ficilkaa sameeya ama u sahla qof kale in uu hawshaa sameeyo waxey dadkaasi mutaysanayaan ciqaab xarig oo sannado badan ah. Sharciyada dembiyeynaya gudniinka, oo qofkii sameeya ciqaab muteysanayo waxey ka ilaalinayaan in xataa waalidkii qurba joogga ahaa oo dhici karta in uu weli aamisanyahey gudniinka, uusan ku dhiiran karin, baqdin uu ka baqayo ciqaabta darteed. Waana sababtaa ay muhiimada u leedahey in dowlada Soomaaliya ay soo jeediso sharci dembiyeynaya dhibkaa, oo aan lagu ekaan keliya mamnuucid.

# Sababaha loo sameeyo gudniinka dumarka

Dadka Somaaliyeed qaar way ka soo horjeedaan gudniinka oo waxay aaminsan yihiin in uusan muhiim iyo waajib midkoodna ahayn, qofkana uu iska deyn karo isagoon wax dembi ah loo soo raacan. Halka kuwo kale ay aaminsan yihiin in gudniinku uu sunne yahay, oo ay wanaagsan tahay in gabadha la gudo, layskana deyn karo haddii la rabo. Halka kuwo kale ay aamisan yihiin in gudniinku diiniyan waajibba uu yahay. Sababna uga dhigaan in gudniinka u wanaagsan yahay gabadha, oo xubin xaaraan ah oo jirkeeda ka mid ah la goynayo. Xubintaa ay xaaraanta u arkaan ayaa ah kintirka gabadha. Xubin Ilaahey ku abuuray, ulajeedo loogu abuuray meeshaa baa dadkan ka dhaadhacsan in ay najaaso tahay. Dadkaasi waxay aaminsan yihiin in gabadha sidaa loo googooyo, loo jarjaro inaysan dareen kacsi yeelanayn oo uu gudniinku yahay wax lagu ilaalinayo dareenkeeda iyo dhaqankeeda. Waa gumeysi aysan ka war hayn saameyntiisa. Dadka sidaa ku dhaqma oo fikirkaa aaminsan waxay u badan yihiin dad aan helin fursado waxbarasho, horumarna aan ka gaarin nolosha. Waana dadka soomaali badankood. Dad aan weli helin barashada iyo buuxinta xuquuqaha aasaasiga ee muwaadinka.

Si kasta oo ay ahaataba, gudniinka gabdhaha nooc kasta uu yahay sunne ama Fircooni waa caado soo jireen ah oo midkoodna aan waajib diiniya qofna ku ahayn. Halis caafimaad uu gudniinka la yimid darteed baa adduun weynaha looga aqoonsaday in gudniinka uu xadgudub ku yahay xaquuqda iyo jiritaanka gabadha. Diintana waa ka soo horjeedaa wax kasta oo dhaawacaya, xumaanna soo gaarsiinaya xaquuqda iyo jiritaanka qofka. Balse sidaan horay ugu soo sheegey gudniinka gabdhaha waa caado dhaqameed fool xun oo mudo dheer soo jirtay, laguna kala fikar geddisan yahay fahamka iyo ku dhaqanka waxashnimadaa.

Gabar Hibo Wardheere la yiraahdo oo u ololeysa sidii lagu joojin lahaa gudniinka Fircooniga baa dood BBC[19] qabatey oo looga hadlayay gudniinka sidan tiri:- “Sababta gudniinka u dhammaan la`yahey waxaa gacanta ku hayaa waa dumarka iyo hooyooyinka oo aaminsan in iyada wixii lagu soo sameeyay, ay iyana inanteeda ku samayn karto. Waxa ay u aragtaa in ay dhaxal wanaagsan uga tagtay gabadheeda. Gabadhiina marka ay berri hooyo noqoto caruurteedii bay iyaduna ku samayn, waxii lagu smaeeyey. Halka dumarka kalana ay shaqo ka dhigteen googoynta caruurta. Iyagaana hortaagan ciribtirka halistan.” Xigmadan Hibo Wardheere waxey sii xoojineysaa muuhimada ay leedahey in dadka ay helaan waxbarasho oo ka jaahil bixisa waxa ay waxashnimadan tahey.

## *Sababaha loogu dhaqmo gudniinka waxaa ka mid ah*

- Sababo dhaqan ahaan sida inuu dhasha kordhiyo ama uu fududeeyo dhalmada.
- Sababo maskax ahaaneed sida inuu ilaaliyo inannimada gabadha.
- Sababo qurux iyo nadaafad ahaaneed, dadka qaar ayaa aaminsan in qeyb ka mid ah xubinta taranka ee haweenku ay nijaas tahay.
- Sababo diineed, dadka qaarbaa aaminsan in waajib diiniyan ay tahay gudniinka gabdhaha.

19 - Wareysi ay Hibo Wardhere siisey BBC oo gudniinka uga hadkleyso, 2016 https://www.bbc.com/news/magazine-36101342

Waxaa xusid iyo qaddarin mudan in culimmada Soomaaliyeed qaarkood ay u bareerreen ka wacyi gelinta dadka dhibaatada uu gudniinka leeyahay. Masaajidada ayey ka wacyi geliyaan. Degaannadooda ayey kala qayb qaataan olalaha iyo wacyi gelinta arrintaa looga hadlayo. Doodaha ayay qaarkood ka qayb qaataan, iyagoo u arka ka hadalka arrintan wax muhim ah. Waxaa aad u sii fiicnaan lahayd in culimada waaweyn oo bulshada dhexdeeda laga garanayo, ixtiraam iyo saameyn weynna ku lihi, ay iyana dhammaantood isku meel uga soo wada hor jeestaan la dagaallanka dhibkan oo wacyi gelinta ay bixinayaan aysan ku ekaan oo keliya su`aal la weydiiyey iyo masjid dhexdii oo ay arintaa uga hadlaan. Waa in ay bulshada ka dhex muuqdaan, oo awooddaa, ixtiraamkaa iyo sharaftaa loo hayo ay dadkooda uga faa`iideeyaan ugana badbaadiyaan halista gudniinka. Taa waxay ku xiran tahay iyagoo mawqif cad ay ka wada qaataan muhiimmadda diiniyan uu gudniin dumar u leeyahay.

Wadaaddada mudan in lagu amaano dadaalkood waxaa ka mid ah Sheekh Guure oo magaalada Gaarisa ee dalka Kenya ah si cad oo aan shaki lahayn uga soo horjeeda jarjarka gabdhaha. Dood arrinta gudniinka ku saabsan ee uu uga qeyb qaatay BBC buu sidan yiri: - "*Arrintan gudniinka Fircooniga waa dhaqan caada ah, oo soo jireen ah, wakhti dheer oo qarniyo badan lagu soo dhaqmi jiray. Marka caadada, sidaa mujtamaca dhexdiisa ugu qoto dheer, way adkaataa in muddo yar lagu joojiyo. Dadka reer miyiga ah baa u badan isticmaalka caadadan, waxaana u sabab yeelaya in ilbaxnnimada iyo is dhexgalka dhaqamo kale ay ku yar yihiin, dhaqankoodana uu xoog badan yahay, dadka ka shaqeeya gudniinka oo weli ku dheggan jaahilnimadaa, fudayd loogama takhallusi karo. Diintuna ma bannaanaynayso in dumarka jidhkooda si qaab daran loo jar jaro oo loo toltolo".*

Dumar badan oo halyeeyo ah oo gudniinka Fircooniga lagu sameeyay, dhibaatooyin badanna kala kulmay, baa intay is xilsaareen bilaabay inay dadka ka wacyi geliyaan ugana digaan dhibabkii ay soo mareen in aanan gabar dambe la marsiin. Halyeyadaa dadaalkooda kuma ekaan oo keliya in ay ka hadlaan oo ay qaylo dhaan ka sameeyaan waxashnnimadaa loo geystey, ee waxay ficil ahaan ugu dareen in ay ururo la dagaallama dhibkaan sameeyaan, oo wacyi gelin iyo aqoon is-weydaarsiyo abuuraan, qaarkood buugaag ayey ka qoreen dhibkii ka soo gaarey, qaarkood filimaan ayay ka sameeyeen gafkii caruurnimmada loo geystey, si ay ummadda digniin ugu noqoto, oo ay ugu cilmi qaadato. Halyeyadaa oo rag iyo dumar isugu jira, dadaalkooda la`aantiis gudniinka maantay meeshuu marayo, meel ka halis badan buu gaari lahaa. Horaa loo yiri, `Far keliya fool ma dhaqdo`. Dadaalka ay dadkaan muujiyeen keligii guul waarta oo muuqata ma uu noqon. Sidaa darteed waxaa loo baahan yahey in si wadajirnimo ah dhibkan isku meel looga soo wada jeesto. Xukuummad iyo shacab intaba.

Maalin aan dhageysanayay dooda jimcaha ee barnaamijka BBC-da oo looga hadlayay gudniinka Fircooniga, ayaa gabar ka qeyb qaadatay doodaa, magaceeda ma xasuusto balse hadal ay tiri oo aan u bogey baan ku soo af jari cutubkan, waxey tiri:- *"Waxaan u arkaa inay caqli xumo iyo caqiido xumo ay tahay, waxaan ugu baaqi lahaa, hadii gudniinka Fircooniga wax fiican yahey, waxaad ka fiirsataan magaca, meeshuu ka soo jeedo, Fircoon, hadii uu wax fiican yahayna Nebigaa dadka ku amri lahaa, Nabigeennuna (SCW) wuxuu yidhi diintu waa fudayd. Kol haddaan Ilahay iyo Nabiguba sheegin, wax maanta Fircoon laga daba kaco, wixii xumaa ee uu sameeyey, anigu caqiido wanaagsan inay tahay uma jeedo*" Waa mid ka mid ah dhagaystaayasha BBC-da.

# CUTUBKA 2AAD
# DIINTA IYO GUDNIINADA GABDHAHA

Buuggaan waxaan ugu tala galey in uu anfac weyn u noqdo ummadda Soomaliyeed dal iyo dibedba, faa`iido iyo wanaagna uu ku soo kordhiyo bulshada iyo aqoonteeda ay u leeyihiin arrintan. Cutubkan diinta waxaan kaloo ugu tala galay in uu noqdo cutub bayaaniya oo kala saara waxa diiniyanka ah iyo waxa aan diiniyanka ahayn ee gudniinka gabdhaha ku saabsan. Waa maxay xaqiiqda gudniinka ee ay diintu ka qabto gudniinka gabdhaha guud ahaan, gaar ahaan gudniinka Fircooniga. Maxaa xaaraan ah? Maxaa waajib ah? Maxay yihiin daliillada ku soo arooraya gudniinka xaaraanka ah iyo gudniinka sunnada ah?

Muddadii aan baaritaankaa ku dhex jirey waxaan la xiriiray oo lana kulmay culimmo badan oo kala jinsiyada ah, qaarkoodna dhaqanka gudniinka aqoon dheer iyo xirfad u leh. Waxaan dhageystey muxaadarooyin badan oo arrintan gudniinka gabdhaha looga hadlayo, oo luuqado kala geddisana lagu muxaadareenayo. Culimmadaa, nasiib xumo, aad iyo aad bay u kala fikrad geddisnaayeen markay noqoto gudniinka gabdhaha, nooc kasta uu yahayba. Culimmadaa gudniinka labo ayay u qeybiyeen, oo mid isku meel bay ka wada ahaayeen, waa gudniinka Fircooniga oo ay yiraahdeen waa xaaraan, waana dembi, laakiin waxay aad ugu kala fikrad geddisnaayeen gudniinka sunnigaa, oo qaarkood waxay aamisanaayeen in gudniinkaa meel ay uga soo aroortay quraanka kariimka ah in aysan jirin. Nebi Maxamed CSW meel lagu soo xigtey in uu gabdhiisii sunnadeeyey ma jirto sidaa darteed bay ku doodayaan inaysan muhiim ahayn in xataa sunno la isticmaalo. Halka culimmada Somaalida ay dhankaa ku kala fikrad geddisan yihhin. Culimmada Soomaalida qaar baa la ra`yi ah culimmada ajaanibta oo aaminsan in sunnada xataa aysan muhiim ahayn oo layska deyn karo, halka wadaaddada kale ee Soomaalida, khaasatan kuwa caanka ah oo la yaqaan ay aamisan yihiin in sunnada ay muhiim tahay oo lagu dhaqmo. Sunnadda ay aamisan yihiin baa ah in gabadha kintirkeeda fooddiisa wax yar oo dhiig ah laga daadiyo ama laga jaro. Haddaba su`aasha is weydiinta mudan baa ah jaritaankaa ulajeedadiisu maxay tahay? Ma faa`iido caafimaad baa ku jirta? Ma faa`iido diini baa ku jirta oo gabadhu xalaal ku noqoneyso? Wax kasta oo la sameeyaa waa in sabab iyo ulajeeddo ay leeyihiin. Goyntaan ay wadaadadeenna ku talinayaan maxay faa`iidado iyo qasaaro u leedahay bulshada? Tan kale, sidee lagu ogsoonaan karaa sunnada ay dadka kula taliyaan in ay tahey sida gabdhaha loo gudo. Waxaan ogsoonahney dadka ka shaqeysta howshaa in ay u badan yihiin dumar waayeel ah, xirfadooda caafimaad iyo aqoonta ay u leeyihiin jirka bini aadamka iyo xubnaha taranka ay aad u liidato, waa aan la soo siin tababar sida wax loo sunneeyo balse ka yaqaan sida wax loo googooyo. Dadka ayaa laga rajeyn in talada culimada ay qaataan oo ay ku dhaqmaan. Sidee bey u hirgeliyaan wax aysan aqoon? Sannadkii hore oo keliya waxaa la soo wargeliyey in dhawr gabdhood oo caruur ah ay u dhinteen gudniinka Fircooniga dartii, waalidkii oggolaaday iyo dadkii halaaggaa sababay, waa dad maantay madax bannaan oo xor ah. Midkoodna lama soo qaban oo lama ciqaabin. Nolol maalmoodkoodii bay iska sii wataan, sidii in aysan waxba geysan oo dhimashaada ay sababeen aysan qiimo lahayn, halisna u yihiin in caruuro kale ay sii galaaftaan oo khatartaa mar kale geliyaan. Sidaa darteed ayay igula quman tahey in maadaama ay culimmada ay yaqaaniin sida wax loo gooynayo, in ay dadka koorsooyin u furaan oo ay baraan sida ay doonayaan in la sameeyo, hadii kale waa in ay isku meel uga soo wada jeestaan joojinta ficilkaan gudniinka dumarka, nooc kasta uu yahey maadaama uusan muhiim u aheyn caafimaadka wax dembi ahna kaa imaaneyn hadii layska daayo.

Culimada la yaqaan mid ka ah ayaa la weydiiyay[20] in gabar yar ah oo 7 jir la gudi karo? Waxuu ku jawaabey in gudniinka in uusan aheyn waajib, hadana kula taliyay in ay sunnada ay fiican tahey, laakiin kan Fircooniga marnana aan la ogoleyn oo uu mamnuuc yahey. Wuxuu ku sii daray hadalkiisa in waaliddiinta qurbaha jooga maadaama dalalka ay joogaan gudniinka gabdhaha nooc kasta uu yahayba mamnuuc iyo dembi ka yahay, inay iska deyn karaan. Taasi waxay kuu muujineysaa in marka koowaad diinta loo wada siman yahay oo aadan u baahnayn in aad idan ka qaadato qof kale oo kula mid ah. Baro diintaada marka hore. Tan kale, waxay kuu xaqiijineysaa in gudniinka gabdhaha nooc kasta uu yahay diin ahaan aysan waajib ahayn.

Sunno ahaana aad iska deyn karto oo wax dembi ahi uusan kaaga imaaneyn.

Maadaama ummadii soomaali ay noqotey ummad ku kala dhantaalsan aduunka dacaladiisa, oo malaayiin soomaali ah qurbo-joog ku yihiin dalal iyo degaamo kala duwan, ayna ka mid noqdeen noloshaa cusub hadey noqoto dhaqan, luuqad, taariikh, nidaam, diin waa muhiim in soomaalinimadooda iyo aqoonsigooda jinsi si dadban loogu dhawro wacyi gelinta ay wadaada bixiyaan oo uusan casharadoodu ku saleynaan keliya xaaladda maantay iyo diiniya, balse ay awood u leeyihiin in ay saadaalin karaan mustaqbalka la hiigsanayo iyo hanka bulsho. Maalaayiin Soomaaliya ayaa qurbaha ku nool oo dadkaa waxay halis u noqon karaan haday dalka dib ugu soo laabtaan in ay dagaal dhaqan iyo kala sooca heerka bulsho ay sameeyaan, waa haddii loo sahlo. Wadaadka Ilaah kheyr ha siiyee, waxaa fiicnaan lahayd in xigmaddiisa uu ku daro saadaalinta berri iyo mustaqbalka jinsinnimo ee dalka waxa uu ku dambayn karo. Marka uu u oggolaaday malaayin gabdho qurbaha ku nool in laga deyn karo gudniinka sababtuna ay tahay oo keliya cabsi laga baqayo in waalidkaa la xabsiyeeyo, balse aysan sababtu ahayn qaddarin jirka iyo jiritaanka gabadha iyo caafimaadkeeda, natiijada ka dhalan kartaa kala qaybintaa ayaa noqon karta markii malaayiin gabdho laga daayo gudniinka, halka malaayiinta wiilal ee dalkii jooga, ku soo korey oo ku barbaarey dhaqanka gudnninka, sidee labadaa fac(jiil) oo aasaaska taranka bulshada ku kala geddisan u noqon karaan kuwii berri dhaxalka u noqon lahaa jinsiyadda Soomaalida? Culimmadeenna kheyr Allaha siiyee, waxay ka hadlayaan maantay, ee waa inay berri siday natiijadu noqonayso ka taxaddaraan.

Buuggaan waxaan ugu tala galay oon Rabi ka rajeyn in uu noqdo buug ummadda faa`iido u keena, wax laga barto, abuura dhiirrigelin in arrintaan gudniinka aan annagaa lahaanshaheed yeelan karno, oo aan naloo sheegin, baran karno oo ku takhasusi karno waxa ay ku saabsan tahay arrintan, faa`iido iyo khasaare waxa ugu jira bulshada, ayaan u arkay in ay muhiim tahay in uu buuggan waddadaa ku dhiirageliyo dadka oo wax kasta oo shaki iyo tuhun abuuri kara aan ka ilaaliyo buuggan.

Dadka Soomaliyeed badankood waa dad diinta ku dhaqma, ka dambeeya dhaqanka, ixtiraam weynna u haya culimmadooda, sidaa darteed baan go`aansaday in aan xaqiiqda arrintan gudniinka gabdhaha aan salkeeda gaaro, oo aan la iiga sheekeyn balse aan barto, ogsoonaado waxa ay diintu ka qabto nooc kasta oo gudniinka gabdhaha ah. Muhiim ma aha in wadaad fikraddiis iyo sida uu isaga wax u turjuntey aan buuggan ku soo qaato. Muhiimadda ayaa waxay tahay in xaqiiqda arrintan salkeeda gaaro, si aan awood ugu yeesho in aan kala saari karo waxa xaqiiqda ah oo ay diintu ka qabto gudniinka gabdhaha iyo waxa ay tahay shakhsiga iyo turjumaaddiisa.
Waxaan codsanaya in raali la iga noqdo, cutubkan oo si fiican u faahfaahsan oo kaamila ah gadaal baan uga soo dari doonaa haddii Rabbi idmo.

20 - Youtube Gudniinka gabdhaha ma waajib baa mise waa layska deyn karaa? https://youtu.be/AdpGAz2029U

# CUTUBKA 3AAD

## Gudniinka Fircooniga waxa uu yahey iyo noocyada uu kala baxo

Gudniinka Fircooniga waa caado dilaa ah, halisna ku ah jiritaanka gabadhaha caalamkana looga aqoonsaday in ay caadadani xad-gudub ku tahay xuquuqda aadanaha ee dumarka iyo carruurta. Xad-gudub ku tahey galmada, dhaawac iyo xanuun aan laga bogsoon sababta. Waa caado bahdileysa, curyaamineysa karaamada iyo hanka gabdha, sidaa darteed ayuu adduunweynuhu u aqoonsadey halista ay leedahey caadadan iyo in laga wada hortago.

In kastoo halista ay caadadani leedahay maanta caalamka laga aqoonsaday, haddana waa nasiib xumo in 30 waddan oo adduunka ka mid ahi ay weli ku dheggan yihiin isticmaalka caadadan, taasoo sannad walba sababta inay malaayiin gabdhood noloashoodu halis gasho.

Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO)[21] oo ah hay'adda Qarammada Midoobay ugu xilsaaran ka shaqanta hagaajinta iyo horumarinta caafimaadka dadka dunida ku nool ayaa ku qiyaasay in adduunka dushiisa ay ku sugan yihiin 125 ilaa 130 milyan[22] oo gabdhood oo gudniinkaas halaagga ah loo geystey.

Waxaa intaas weheliya in sannad walba saddex milyan oo gabdhood noloshooda halis lagu geliyo gudniinkaas fircooniga ah xubintooda tarankana sidaas lagu naafeeyo.

Gabdhaha Soomaaliyeed waxaa lagu qiyaasaa in ka badan 90% in la gudey,[23] walibana loo gudey nooca waxashnimada ku saleysan oo loo yaqaan gudniinka Fircooniga, afka qalaadna loogu soo gaabiyo FGM.

Muddo 10 sano ka badan ayaan u shaqeynayay Wasaaradda Isdhaxgalka iyo Kaladuwanaanta oo aan u qaabilsanaa arrimaha la xiriira tacadiyada iyo dhibaatooyinka xadgudubka jinsiga ku saleysan**,** sida guurka khasabka ah, gudniinka fircooniga, ku-xadgudubka xuquuqda aadanaha, iwm. Muddadaa aan howshaas ku dhex jirey ummadihii aan la kulmay qaar ka mid ahi waxay ahaayeen dad loo geystey gudniinka fircooniga oo ay dhibaatooyin kala gedisani ka soo mareen. Dadkaasi waxay ahaayeen dad kala jinsiyad ah isla markaasna ay da'doodu kala duwaneyd. Waxyaalaha aan shakhsi ahaan aad uga heli jirey, markaan dadkaas wada hadleyno, ayay ahaayeen sida ay u kala fikrado geddisnaayeen markey noqoto dareenka iyo habka loo soo gudey. Qaar baa sheeganayay in gudniinka lagu sameeyay aysan wax dhibaato ah kala kulmin, isla markaasna ay iyaga qudhoodu gudniinka rabeen si ay dadka waaweyn ugaga mid noqdaan. Halka qaar kale, oo dadkaas ka mid ahaa ayaa ka murugeysnaa marka ay kaaga sheekeynayaan dhibaaooyinkii ka raacey gudniinka iyo sida arxan li'ida ahayd ee loo gudey.

---

21 - Waxa ay tahey WHO- https://www.e-ir.info/2010/11/08/what-are-the-main-functions-of-the-world-health-organization/

22 - Istaraatiijiyadda cusub oo lagu xoojinayo la dagaalanka caadooyinka xun muddada u dhaxeysa 2014 - 2017 - https://www.regjeringen.no/globalassets/upload/ud/vedlegg/humanitc3a6rt20arbeid/strategi_lemlestelse_2014.pdf

23 - Warbixin 13/2011 Dood-wadaag: Naafaynta xubnaha taranka. Maxaa dhacaya iyo maxay Noorway qabanaysaa?
Xitfad aruurin ay qortey Marit Berggrav - Sebtember 2011
https://norad.no/globalassets/import-2162015-80434-am/www.norad.no-ny/filarkiv/vedlegg-til-publikasjoner/kjonnslemlesting--hva-skjer-og-hva-gjor-norge.pdf

Maalin maalmaha ka mid ah, anigoo la jooga dumar baranayay barnaamij ku saabsan barbaarinta carruurta, ayaa mid ka mid ahayd dumarkii meesha isugu yimid waxay ku cabatay in gabadheeda oo 20 jir ahi ay aad ugu dhibtooto markuu dhiigga caadadu ku dhaco. Hooyadaas ayaa ku tilmaantay in gabadheedu ay noqoto sidii qof waalan oo kale markuu dhiigga caadadu ku dhaco. ”Xanaaqa iyo qeylada afkeeda ka soo baxaya ma aha mid loo dulqaadan karo”, ayay tiri hooyadii. Iyadoo hadalkeedii sii wadata aadna u murugaysan ayay tiri: "Maalmaha ay gabadhaydu xaaladdaas ku jirto, annaga oo dhammi argagax iyo cabsi baan ku jirnaa. Wax kasta oo daawo noqon kara waan ku dayay, nasiibdarrona wax isbeddel ah laguma arag, haba yaraatee." Dumarkii kale oo hooyadaas iyo carruurteeda garanayay baa fikrado kala geddisan goobta ka soo jeediyay sida in gabadha qodobbadii gudniinkii hore lagula sameeyay laga furo si ay meeshu u yeelato duleel weyn oo uu dhiiga caadadu ka soo bixi karo; qaar kale waxay soo jeediyeen in Quraan lagu akhriyo, ama dhakhtarka cilmi nafsiga ku takhasusay loo geeyo, amaba dhakhtar dibadeed degdeg loogu qaado. Hooyo kale oo ka mid ahayd dumarkii meesha fadhiyay oo aan cabbaar hadlin baa tiri: "Idinku waxaad ka hadleysaan sidee xanuunka dhiigga looga yarayn karaa, aniguse waxaan idin weydiinayaa sidee dib loogu heli karaa xubnihii gabadhaas miskiinta ah gudniinka fircooniga lagaaga gooyay?" Waxay kaloo hadalkeeda ku sii dartay oo tiri: "Maxay noloshaada qiimo leedahay mar haddii aadan waxba dareemeyn?"

Dumarkii cabbaar bay aamuseen iyagoo yaab la fajacsan isla markaasna isfiirfiirinaaya sidii hooyadaas loogu jawaabi lahaana ka fekeraaya.

Tii dumarkaas ugu weynayd baa tiri: "Bisinka! Naa maxaad tiri? Muxuu yahay waxa lagaa gooyay oo kaa maqan, oo aad raadineysaa? Waadba naga yaabisaye? Gabar kale baa hadalkii ka daba qaatay, oo intii ay islaantii hore ku celisey iyadoo si kale u dhaheysa oo qosleysana bey tiri: "Wallaahi heblaayo waa iga yaabisay! In aad shactirooley ahayd ma kuu maleynaynin. Hal mar baa la wada qoslay. Qosol aad dareemeyso in ay wax ku lammaasan yihin. Gabadhii looma jawaabin, mawduuciina waa la beddelay.

Casharrada tarbiyada waxaa dumarkaas u dhigayay labo gabdhood, mid norwegian ah oo cilmi nafsiga soo baratay iyo gabar soomaali ahayd oo iyaduna barnaamijkaas baratay, turjumaanna u ahayd dumarkaas.

Hooyadii su`aashaa bilowday waxaan ka dareemay in ay yaxyaxday oo laysku dayay in la cabburiyo. Balse naag naag dhaaftay bay ahaydoo, ma oggolaan in faceed cabburiyaan. Cod bayaan ah oo awood kalsooni ku dheehan tahay bay mar kale ku celisey su`aasheedii hore oo ay weydiisey dumarkii. Markaan qof walbaa wuu maqley su`aasheeda, laakiin cid ka jawaabtaa la waayay. Hoos baa la fiiriyay oo lays mashquuliyay. Hadalkeedii bay sii wadatay waxayna tiri: "Kulligiin waad iska kala baqaneysaan, oo iskuma kalsoonidin. Haddii la idiin soo gudey, oo sideyda oo kale habka fircooniga la idin ku soo gudey, waad garaneysaan waxa aan ka hadlaayo, laakiinse idinka ayaa kala baqanaya, oo is cabburinaya oo aan isku oggolayn in aad kala fikrad geddisnaataan."

." Intaas markey tiri, baan anigu hadalkii soo dhex galay, si aan arrinta u qaboojiyo uuna muran isku beddelin. Gabadhii baan u sheegay sharciyada ka yaal Norway markay noqoto dib u soo dhisidda xubintaa taranka ee gudniin dartiis looga gooyay, iyo jaanisyada ka jira dalalka nala jaarka ah. Gabadhii cilmi nafsiga baratay baa iyaduna u sharraxday waxa (tabu)-ga la yiraahdo (waxa aan laga hadli karin) iyo sababta kallifta in ay wax tabu laga dhigo oo la qariyo. Gabadhii soomaalida ahayd baa iyaduna dumarkii u sharraxday sida ay ummadaha kale ee ay xiriirka la lahayd sida Gaambiyiinta iyo Kurdistanka oo iyaguna ku dhaqma gudniinka sida ay uga hadlaan dhibaatooyinkooda. Waxay ku tiri dumarkii: "Waxaad ogaataan in markii uu wada-hadal yimaado ayaa waxaa dhasha is fahan iyo xal raadin. Haddaan Soomaali nahay heerkaas rabitaan oo aan dhibkeenna uga wada hadli karno weli ma aynaan gaarin, oo waxaa inagga hortaagan aqoon yari iyo tas-hiilaad la'aan”.

Dumarkii baa waxaad moodday in kala-shakigii dhexdooda yaalley hal mar laga qaaday waxayna bilaabeen in ay ka hadlaan dhibabka ay ka dhaxleen gudniinka carruurnimadooda loo geystay iyo siduu nolashooda u kala dhantaalay. Xanuunno badan bay ka hadleen oo qaar ka mid ah dumarkii la ooyeen. Gudniinka Fircooniga waxaa laga dhaxlaa xanuun waara oo aan laga bogsoon. Dumarkii tii ugu da`da weynayd baa tiri: "Gabdhow, dacar malab ma noqon kartaa? Waxaad ogaataan inuu gudniinka Fircooniga ah asalkiisu ahaa cadaadin la cadaadinayo dareenka gabdhaha. Nasiibdarro, cadaadintaasi waxay inoo noqotay dhaqan aynu iska aqbalnay. Dhibkan iyo xanuunkan wuxuu soo socdey qarniyo waana uu ka fac weyn yahay Diinteenna. Dumarow, runtii jaahilnimo ayay inoo tahay in aynu maanta oo aynu ogsoon nahay dhibkiisa aynu weli ku sii dhaqmeyno. Waxaan idin kula talinayaa in aad tallaabo geesinnimo leh oo raadraac wanaagsan noqota qaaddaan oo aad dhallaankiinna ka badbaadisaan dhibkaas xanuunka weyn leh. Aniga goor dambe oo aan dabaqabad lahayn ayaan baraarugey, hase yeeshee intiinna kale rajo ayaad weli leedihiin."

Waxaan maqli jirey, dumarka Soomaaliyeed waa dad aan ka baqan oo ceeb iyo caddibaad toona u arag ka-hadalka dhibaatooyinka gudniinka Fircooniga ahi uu leeyahay. Maalintaa ayaan ogaaday in ka-hadalka la ina ku tilmaamayo oo aynu geesiyiinta ku nahay uu yahay ka-hadalka xanuunnada muuqd, sida xanuunnada yimaada marka dhiigga caadada gabadha ku dhaco, xilliga ay foosha ku jirto, iyo wakhtiga guurka iyo galmada iwm. Xanuunada muuqda waa kuwa ugu badan ee markii laga hadlayo gudniinka Fircooniga ay dadka badankiis qoraallo iyo baaritaanno ka sameeyeen, aadna looga hadlay. Intaan buuggan qoraayay waxaan aad isugu dayay in aan helo wixii baaritaanno iyo macluumaad ah oo laga sameeyay gudniinka Fircooniga, khaasatan dhanka xanuunka maskaxda iyo inta uu le`eg yahay xanuunkaasi iyo inta ay saamayntiisu le`eg tahay, haddii ay noqon lahayd xanuunka, dareenka iyo welwelka ay ku soo kordhisey gabadha la gudey siiba haddii lagu gudey dhul dagaal ka socdey oo aan xasillooneyn. Nasiibdarro ma aanan helin macluumaadkaas, hase yeeshee waxaan ka cabbir qaadatey aqoonta iyo khibradda aan u leeyahey mawduucaan, ku-soo-koriddayda dhul dagaallo ka socdaan iyo saameynta cabsi uu jawigaas ku yeelan karo qalbiga iyo doodo aan qabtay intii aan buuggan qoritaankiisa ku dhex jirey. Arrimahaas oo dhammi waxay ii saamaxeen in aan wax ka fahmo xanuunnada iyo dhaawacyada ay la kulmi karto gabar gudniinka Fircooniga lagu gudey iyadoo weliba ku sugan dhul aan xasillooneyn oo aan nabad ka jirin. Waa cabsi iyo xanuun labo jibaaaran.

# Galabsiga gudniinka

Inta aynaan ka hadlin noocyada gudniinka dumarka iyo dhibaatooyinka iyo xanuunka uu sababo waxaa wanaagsan marka hore in laysla fahmo galaabsiga Fircooniga waxa uu yahey iyo dhaawaca uu soo gaarsiiyo xubnaha taranka ee dumarka. Xubnaha taranka dumarka, kuwa muuqda ayaa ka kooban labo bishimood oo waa weyn oo banaanka ku yaal iyo labo bishimood oo yar yar oo gudaha ku yaal iyo kintirka oo door weyn ka qaata raaxada iyo galmada.

**Faruuryaha waaweyn:** Waa laba lakab oo maqaar ah, kana billowda bisqinleyda, jiitamana ilaa lafta dabaqanaanta, halkaana ku milma. Faruuryuhu waxay ka samaysan yihiin gaballo xayr iyo carjaw isugu jira iyo shabakad dareemeyaal aad u dareen fudud ah. Waxa kale oo ka dhex buuxa xididdada dhiigga qaada oo soo gaarsiiya dhiig aad u fara badan.

**Faruuryaha yaryar:** Waa laba lakab oo maqaar khafiif ah, kuna dhaca dhanka gudaha ee faruuryaha waaweyn, waxana laftooda soo gaara dhiig aan yarayn. Dhanka gadaale, faruuryaha yaryari waxay ku kulmaan xuubka bikaarada, dhanka horena waxay daboolaan kintirka. Faruuryaha yaryar waxa dhinaca dambe kaga dhex jira daloolkii hoose ee cambarka, dhanka horena kii kaadida.

**Kintirka:** Howsha ugu muhiimsan ee uu kintarka qabto ayaa ah qancinta galmo waana xubin u dhiganta xubinta taranka ragga marka ay noqoto xagga dareenka galmo iyo kacsi. Mudo dheer ayuu kintirku saynisyahannada ku ahaa wax dahsoon oo qarsoon oo aan la aqoon waxa uu yahey iyo dhererka uu le`eg yahey. Dhakhtarad u dhalatey dalka Austraaliya oo la yiraahdo Helen O'Connell[24] oo ku takhasustey cilmiga lafaha ayaa 1998 ku guuleysatay inay si buuxda u muujiso jiritaanka xubintaa ka dib markey baaritaano ku sameysey dumar badan oo ay uurkujirkeeda raajatada MR ka qaadey ayaa la ogsoonaadey. Waxaana lagu qiyaasaa in u dhaxeeyo qiyaas ahaan 7-12[25] cm, markey kacsatana aad buu u bararaa oo u sahlaa in ay biyo baxdo. Falanqayn lagu sameeyay 33 daraasadood 85-kii sano ee la soo dhaafay ayaa muujinaya in inta u dhaxaysa 50 iyo 75 boqolkiiba dumarka ay biyo bax helaan markii uu kintirku kaco(stimulation) lagu sameeyo.

Xubintaa taran waxaa dhex mara xididdo aad u faro badan oo dhiigga qaada. Kintirku waxuu ku yaal halka ay ku kulmaan xubinta taranka- labada faruuryood ee yaryar dhankooda hore, salkiisuna wuxuu ku dhow yahay daloolka kaadida. Waxaa badanaa lagu daboolaa maqaar yar. Kintirka ciyaar ciyaar looma abuurin, balse waxa uu leeyahay shaqo dabiici ah oo aad muhiim u ah. Sida tarranak ninka uu u kaco ayuu kintirkuna u kacaa, dabeetana labadaa faruuryood ee waaweyn dhiig ka soo buuxsamaa, qanjirraduna dheecaan soo daayaan fududeeya howsha galmada, gabadhana siiya dareen macaansi ee ay ku raaxeysaneyso howshaa galmo.

24 -
-12 xaqiiqo oo ku saabsan kintirka
https://illvit.no/mennesket/sex/12-fakta-om-klitoris

25 - Tobanka waxyaabood oo aadan ka aqoonin kintirka
https://www.theguardian.com/society/2017/jan/23/clitbait-10-things-you-didnt-know-about-the-clitoris

## Muhiimada kintirka

Kintirka waa dhexyaal muhiimad badan u leh marka laga hadlaayo raaxada galmada. Waa udub-dhexaadka dareemayaasha kicinta galmada iyo qanacsanaanta. Xubintan waxey leedahey ilaa 8,000[26] dareemeyaal, halka xubinta taranka ragga ay leedahey 4000 dareemayaal. Ma jirto xubin la mid ah oo korka bini`aadamka ku taal oo intaa dareemayaal leh. Sidaa darteed bey muhiim ugu tahey xubintaa shakhsiga iyo lamaanayaasha markey noqoto dhanka galmada.

Waxaan cutubyadii hore ku soo xusey taariikhda gudniinka Fircooniga iyo sababaha loo isticmaalo oo ku soo uruureysa cadaadin iyo xakamayn dareenka gabadha. Su`aasha isweydiinta mudan baa noqon waa maxey sababta loo xakameynayo dareenkeeda iyo raaxadeeda hadii uusan cabiidsi jirin, aqoon xumo ku saleynsan? Kor la jarjaraa marnana xakameyn maayo kasciga iyo dareenka gabadha. Xubnaha taranka dhediga waa qeyb muhiim ka ah jidhka gabadha oo Rabi ugu tala galey hawl in ay qabato. Hadey xubintaa najaaso tahey ama dhib ay u keeneyso gabadha Ilaah kuma abuureen ee waxa ku kalifaya dadka in ay weli siticmaalaan waxan waa jaahilnimo aqoontii looga bixi lahaa loo baahan yahey.

Mudadii aan buuga qorayay baan 30 dumar ah oo kuligood lagu soo sameeyay gudniinka Fircooniga wareysiyaal la yeeshey. Wareysiyo keli keli ah, marnana koox kooxo ah. Soddonkaa dumar shan ka mid ah ayaa sheegatey in aysan wax xanibaad ah aysan kala kulmin gudniinkii lagu soo sameeyay hadey noqoto xanuuno jismi iyo ama qalbi. Halka dumarka intiisa kale cabashooyin kala gedisan ay ka muujiyeen gudniinkii iyo jarjaridii ay soo mareen. Farqigaa u dhaxeeyay labadaa koox, iyagoo isku si loo soo wada gudey baan oran karaa in uu ku saleysnaa dhanka qalbiga oo kooxda aan dhibka kala kulmin gudniinka waxey sheegeen in waalidkood qalbi ahaan u soo diyaariyay qaliinka sugaya, iyagana ay rabaan oo qalbi ahaan diyaar ugu ahaayeen. Halka gabdhaha kale qarsoodi iyo xoog iyo qasab lagu soo gudey oo qaarkood intey dhawr furfurteen dib loogu celiyay gudniinkii iyo toliinka.

Anigoo wareysiyadaa heysta ayaan haddana akhristey oo dhageystey warbixino kala gedisan oo looga hadlayo gudniinka iyo galmada. Warbixinadaa qarkood waxey sheegayaan in bulshooyin qaarkood sida Suudaanta uu gudniinku Firciiniga gabdhaha ka helaan dareen kacsi oo dheeraad ah, halka kuwa dareenkoodu hoos u dhaco. Warbixinadaa waxey kaloo sheegayaan in dareenka kacsiga uusan ku xirneyn kintirka oo keliya ee uu yahey rabitaanku ka yimaada qalbiga, kintirkuse u sahla helitaanka gaarida jawigaas fiican.

26 - Dareemayaasha kintirka, 2017 - https://www.irishtimes.com/life-and-style/health-family/the-clitoris-has-8-000-nerve-endings-and-nine-other-things-we-learned-from-a-new-artwork-1.2947694

Mudadii aan buuga qorayay ayaan dumarkii aan wareystey badankood waxey cabasho ka muujiyeen xanuunada dhanka qalbiga iyo galmada ee ay kala kulmeen gudniinka. Waxaan markaa sameeyay kal fadhiyo looga doodayo arintan. Saddex doodo ayaan qabtey oo looga wada hadlayay dhibaatooyinka gudniinka iyo sida looga gudbi karo. Doodahaa ayaa habeen dhalinyarada u qabtey, habeen ragguu ahaa habeenka kalana dumarkaan kulansiiyay. Habeenkii dhalinyarada oo gabdho u badnaa waxaa isugu yimid dhalinyaro qaar ku dhalatey dalkan oo aan wax aqoon ah u laheyn gudniinka balse xiiseynayay in ay wax ka ogaadaan mawduucaa iyo dhalinyaro iyagoo yar yar dalka yimid oo horey loo soo gudey. Dhalinyaradaa waxyaalaha ay diirada saareen ayaa aad ii welwel gelisey. Waxey sheegeen in hay`adaha caafimaad ee Noorway aysan aqoon fiican u laheyn dhibaatooyinkooda, iyagana ay ku adag tahey sidey dhibkooda uga hadli lahaayeen luuqada dalka oo aysan si fiican u aqoon iyo dareenka ka hadalka oo aysan dhaqan ahaan u laheyn. Gabar ka mid aheyd gabdhihii meesha isugu yimid baa sheegtey in dhawr sano horteed ay isa soo furtey xanuunka dhiiga caadada oo aad ay ugu soo dhibtoodey. Kalkaalisadii iskuulka ay dhiganeysey bey u sheegtey xanuunkeeda. Kalkaalisadii waxey la xiriirisey isbitaalka weyn ee Ullevål. Wakhti qaliin ayaa loo qabtey. Maalintii qaliinka ayay timid, qolkii qaliinka ayaa loo sii gudbiyay oo mudo yar ka dib hawshii waa dhamaatey. Gabadha waxey ka cabaneysaa in xanuunkey u tagtey meesha mid ka weyn in uu ka soo raacey. Waa midii markii looma sheegin qaliinka lagu sameenayo waxa uu yahey. Maadaama fahankeeda luuqada uu liitey, cidna iskuma dayin in ay ogaato taa si turjumaan loogu sii dalbo. Markii la fureyna ma aysan sii helin la socodka caafimaad ee ay u baahneyd. Gabadhii furitaankii dhibaatooyin bey ka qaadey, oo sababtey in mar kale hadana la furo. Ku sii socodkaa isbitaalka oo aysan fahmin ulajeedada, furitaankii oo sidey u maleynsey uusan noqon gabadhii waxey leedahey waa iga raacey shook saddex jibaaran. Shook iyo cabsi gudniinkii sababey. Shook iyo cabsi ay kala kulantey xilligii dagaalada markii reerkoodi la soo weerarey iyo shoogii ay isbitaalka Oslo ka qaadey. Sheekadeedaa gabdhihii dhageysanayay cabsi ayay ku ridey.

Habeenkii dumarka iyo doodooda waxaan horey u soo kaxeysety labo gabdhood oo mid aheyd dhakhtarada maskaxda midda kalana ay aheyd kalkaaliso ku takhasustey cilmiga galmada. Kalkaalisadaa waxey horey u soo qaadatey labo caag oo laga sameeyay taranka dumarka ah (siilka), mid gudan iyo mid aan gudneyn. Dumarkii markii hore waa yaabeen, balse markii dambe waa la qabsadeen oo shirkii aan ugu tala galney 2 saac waxuu nagu qaatey 5 saac oo weliba dumarkii iyagoo raba in sii joogaan baan qasab meesha uga dirney. Qaar ka mid ahaa dumarkii waxey ii shegeeen in ay wakhti dheer ah la qaateen kalkaalisadii si ay u fahmaan waxa laga gooyay waxa ay yihiin iyo sidey ula noolaan karaan dhaawacaa.

## Noocyada Gudniinka Gabdhaha

Dr Cabdiqaadir Weheliye ayaa waxa uu sheegay in gudniinka fircooniga ah uu keeno dhibaatooyin dhaw iyo kuwo fog. Dr Abdikadir Weheliye ayaa sheegay in gudniinka loo qaybiyo saddex qaybood oo kala duwan.

Qaybta kowaad iyo qaybta labaad ayaa lagu tilmaamaa noocyada sahlan qaybta sedexaad ee fircooniga baa afar u sii kala qeybsanta: - *"Waxa ay sameeyaan ayaa ah in ay qalliin ku sameeyaan xubnaha taranka gabadha, kuwaasi oo loo qaybiyo qaybta kowaad, qaybta labaad iyo qaybta saddexaad"* Dr Weheliye.[27]

Sida uu u dhigay ururka caafimaadka adduunka (WHO) jaridda xubinta taranka ee dumarka ee (FGM) loo soo gaabiyay ayaa ka kooban afar qeybood. Waxyeelladeedana ay ku xirantahay hadba nooca gudniin ee la isticmaalo. Inkastoo ay dood ka jirto in dhammaan gudniinka gabdhaha ay hoos imanayaan afartaa qeybood iyo arrinta la xariirta kalsoonida xogaha la hayo.

***Nooca koowaad:*** waa marka la jaro feetinka (kintirka) gabadha dhamaantii ama qayb ka mid ah. WHO waxa ay qeybta kowaad ka dhigtay in "si buuxda ama bar ah loo jaro kintirka (clitoridectomy) iyo/ama qolofta ku dahaaran/koofida kintirka (clitoral hood)"; noocan waxaa loo sii kala qeybin karaa qeyb hoosaadyadan: Ia: in la jaro koofida kintirka oo qura (taasoo aragtiyada qaar leeyihiin waa mid udhiganta gudniinka ragga) Ib: in la jaro kintirka iyo qoloftiisa*"Waxaa laga yaabaa in marka hore lagu bilaabo in la gooyo cadka dhexe ka dib na la gooyo bushimaha qaybta hoosi" ayuu yiri Dr Weheliye.*

***Nooca labaad:*** waa marka la jaro dabnaha yaryar iyo kintirkaba, waxaana haweenayada loogu darayaa qodob ama xidhniin. WHO waxa ay ku qeexday nooca 2aad: "jaridda qeyb ahaan ama gebi ahaan kintirka iyo bushimaha yar yar iyo/ama jaridda bushimaha waa weyn". Sidoo kale noocan waxaa loo sii kale qeybin karaa:-

IIa: jaridda bushimaha yar yar kaliya
IIb: jaridda qeyb ahaan ama gebi ahaan kintirka iyo bushimaha yar yar
IIc: jaridda qeyb ahaan ama gebi ahaan kintirka, bushimaha yar yar iyo kuwa waa weyn.

***Nooca saddexaad:*** waa marka labada dabnood ee waaweyn la jaro, Waxaana la soo yareynayaa daloolka xubinta taranka. Qaybta saddexaad ee gudniinka fircooniga ah ayaa waxa ay tahay mid ugu daran islamarkana sidata dhibaato badan. Dr Cabdiqaadir Weheliye ayaa sheegaya in qaybta saddexaad ay tahay midda lo yaqaano qodbidda ama tolmada. Jarid iyo giijin (tolid).


WHO waxa ay ku qeexday nooca 3aad: " in la yareeyo afka unugga dhalmada iyo galmada (cambarka) iyadoo lagu abuurayo dabool sijilaateysan oo laga keenay jaridda iyo dib u meeleynta bushimaha yar yar iyo/ama bushimaha waaweyn, iyadoo ay la socoto ama aaney la socon jaridda kintirka (jarid iyo giijin)". Waa habka ugu ballaaran ee curyaaminta ama dhaawicidda xubinta taranka dumarka, waxa uuna gaarayaa 10% dhammaan noocyada kale, waxaana lagu sheegay qaaradda Afrika. Noocan jaridda iyo giijinta isugu jira waxaa loo yaqaan gudniinka fircooniga oo ay somalida intooda badan isticmaasho.

27 - Gabdhaha Soomaalida 98% ayaa loo guday habka fircooniga ah, BBC- https://www.bbc.com/somali/war-42961979

Jaridda iyo giijinta waxa ay saameysaa unugyo ballaaran oo ka tirsan xubnaha taranka ee bannaanka ku yaal, waxaana ka mid ah: faruuryaha yar yar gebi ahaantood iyo qeybaha gudaha xiga ee faruuryaha waa weyn. Dabadeedne bushimaha waaweyn ayaa la isku tolaa iyadoo la adeegsanayo qodax ama waxyaabaha wax lagu tolo. Kaddibna waxaa la isku xiraa labada lugood ee gabadha muddo 2-6 todobaad ah si looga hortago dhaq dhaqaaq iyo in loo saamaxo inay reystaan labada dhinac ee xubinta taranka, muddadaas waxay gabadhu dhib badan kala kulantaa kaadida, saxarada iwm, waayo dhulki oo dhan ayaa la wada jaray oo dhaawac ah, luguhna way isku xiranyihiin. Waxba ma soo harin, darbiyo hilib la jar jaray ah uun baa usoo haray, ka soo billoow bisaqa (shuunka) ilaa futada (halka laga saxaroodo)!!!, Waxa keliya ee loo reebay waa dalool aad u yar oo qeybta hoose looga tago si ay uga soo baxaan kaadida iyo dhiigga caadada. Falkan sameyntiisa waxaa lagu sameeyaa miyi iyo magaalo, waxaase sii daran miyiga oo aqoon la'aanta baahsan ee ka jirta ay saacideyso sii socoshadiisa, waxaana fuliya dumarka waa weyn ama umuliso dhaqmeedka tuulooyinka jooga, iyadoon la isticmaalin qalab la jeermis dilay iyo kabaabiso.

*"Qaybta Fircooniga ee adag ayaa waxay tahay in marka gudniinka la sameeyo ka dib la jaraa bishimaha oo markaa la tolaa taana waxaa loo yaqaanaa qodob, gabadhiina waxaa loo reebayaa meel yar oo ay kaadida kaliya soo marto" ayuu yiri Dr Weheliye.*

***Nooca afaraad:*** lama garanayo sida loo sameeyo, wadamada qaarbaa gubniin ama dab isticmaala, waana nooca ugu xun. wixi ka duwan qeybaha aan horey usoo sheegnay waxa ay soo wada hoos galayaan qeybta 4aad. Ururka caafimaadka adduunka WHO waxa uu ku qeexay qeybta 4aad: "hab kasta oo waxyeeleynaya xubnaha taranka dumarka iyadoo aaney jirin sabab caafimaad oo keentay, tusaale ahaan waxaa ka mid ah; daloolin, wax ku mudid, jarid, xoqid iyo gubid'.




28 - Noocayada FGM - https://www.endfgm.eu/female-genital-mutilation/what-is-fgm/ - The End FGM European Network (End FGM EU

## Da'adee lagu gudaa gabdhaha

Da'da gabdhaha gudniinka lagu sameeyo wey kala duwanyihiin. Waxaa jira bulshooyinka gabdhahooda guda bilaha ugu horeeya ee ay dhashaan, kuwo kale waxey gudaan gabdhahooda inta u dhaxeysa marka ay yihiin 4 ilaa 8 sano jiro. Halka kuwo kale ay gudaan habalahooda inta ay gabadha qaangaarka ay tahey ama qof weyn noqotey. Soomaalida waxaa lagu tilmaamaa in inta badan ay gabdhaha gudaan inta aysan gaarin 10 jir. Waxaa macluumaadkaa qorayo waaxda socdaalka ee Landinfo ee dalka Norway oo sii sheegaysa in qeybaha kala gedisan ee dalka iyaguna ay da`daa 10 jirka ay u badan tahey in gudaan gabdhahooda.

Waxaase la sheegaa in ay mararka qaarkood dhacdey in la gudo gabdho soo galootin ah oo qurbaha ka soo jeeda in da` ka waa weyn da`da loogu talagaley la gudey.

## Sida loo hirgeliyo jarjarka xubinta taranka ee dhediga - gudniinka Fircooniga

Gudniinka Fircooniga markii gabdhaha lagu sameynayo waxaa la jaraa qayb kamid ah faruuryaha waaweyn, ka dibna la dabar jaro faruuryaha yaryar iyo kintirka. Dabadeeto qori dhuuban (sida kan taraqa ama (kabriidka)) inta la dhex suro faruuryihii waaweynaa ee qaybta laga jaray baa markaa dhinacyada laga soo qodbaa, amaba lama qodbee, labada bawdo ee inanta laysku dabraa, si dhaawacii faruuryuhu isugu bogsado (baanto). Afartan beri kedib baa dabarka laga furaa si loo hubiyo inuu cambarkii gebi ahaamba isku baantay.

Qoriga yar ee dhexda la suray waxa loogu talo galay in kolkay faruuryuhu isku baantaan ay reebaan dalool ay gabadhu ka kaadiso kolkay qaan gaartana dhiigga caadadu uu ka soo baxo. Sidaas baa haddaba dumarkayaga looga xayuubiyaa dumarnimadooda iyo sharafta Rabi ugu deeqey. Gabadha sidaa loo galay waxa nafteeda iyo nolosheeda hareeya nacayb, cadawtinimo iyo kalsooni xumo mar haddaanay galmada ninkeeda ugala qaybgeli karin sidii dabiiciga ahayd ee Rabi ugu talagaley.

Gabadho aan la kulmey oo aan wareysi la yeeshey mar aan diyaarinayay buuggeyga shahaadada Mastarka baan ka wareystey noocyada gudniin ay soo mareen iyo xanuunada ay kala kulmeen. Gabdhahaa oo kuligood ahaa qurbo-joog mudo dheer dibahaha deganaa, ayaa kuligood waxey ka cabanayeen dareen xumidda galmo ee ay ka dhaxleen gudniinka Fircooniga. Gabdhaha hadalkoodii waxaan ka dareemey in uu ku abuurmey wel wel iyo walbahaar. Gabdhahaas qaarkood waxey ahaayeen gabdho waxbartey, muruqmaal noqdey oo bulshada ay la nool yihiin ay aqeyb ka yihiin. Dadaalkaa ay gabdhahaa sameeyeen waxey u sahashey in ay fahmaan dhibka loo geystey waxa uu yahey, inta uu le`eg yahey iyo sida ay ku maareyn karaan noloshooda iyagoo dhibkaa qaba. Halka gabdhihii kale qaarkood ay ahaayeen gabdho dalka ay joogaan noloshiisa aysan horumar weyn ka gaarin, lana qabsan noloshaa cusub ee ay cagahooda ku soo raadsadeen. Luuqadii oo aysan baran, waxey ku kaliftey in macluumaad anfac u noqon lahaa noloshooda ay halkaa ku waayeen. Markii la hadlayay gabdhahaa waxey u badnaayeen kuwo aamusan oo fikrad dhiibashada ku yareyd. Waxaan is weydiiyay miyey dhici kartaa in gudniinka Fircooniga kalsoonida gabdhaha dhaawac soo gaarsiiyay.

Ajaanibka ugu badan dalkan Norway beynu nahney. Hadana ajaanibka ugu liita dhanka shaqada beynu nahney, qaasatan dumarkeena. Talow gudniinka Fircooniga dareenkii ku dhiiranaanshaha, isku deyga, isku kalsoonida, hiigsada han dheer dareemadaa oo qofka hankiisa hagi lahaa, miyuu Fircconi gabdhihii ka diley?.

Gabdhahaa mid ka mid aheyd oo kalkaaliso aheyd baan maalin u raacey shir ay qudbad ka jeedineysey. Halkaa waxey dadkii ugu sheegtey sheeko aad u murugo badneyd, oo aan ka codsadey in aan idinla wadaagi karo. Gabadha sheekadeeda sidan bey aheyd: -

Waxaan u bixiyay sheekadeeda farsamo xumadii reer Galbeed: - waxey tiri waxaan imid tuulo yar ee Waqooyiga Norway bilowgii 1999, markaa uur baan lahaa, oo ilmihii koowaad uurkiisii baan sidaa. Dalka aniga iyo ninkeyga waa ku cusub nahay oo luuqada si fiican uma aynaan baran. Mudo gaaban ka dib fooshii baa i qabatey oo Ilaah wiil buu na siiyay. Intaan uurka lahaa cid i weydiisey in aan gudanahey iyo in kale ma jirin. Aniga iguma soo dhicin in aan isbitaalka iyo kalkaalisooyinka inta uurka lahaa ila socdey in aan gudanahey, si ay isku sii diyaariyaan. Xilligii dhalmada baan asbuuc ka soo hormarey, oo habeen si deg deg ah fooshii ii qabatey. Isbitaalkii noogu dhawaa baa la iila cararey. Kalkaalisadii markii ugu horesey fiirineysey foosheyda intey le`eg tahey iyo furitaanka meesha uu ilmaha ka soo baxayo intey i fiirisey, iyadoo qofkeena la haldin bey dhakhtarkii soo kaxeysey. Isagii intuu i fiiriyay, kalkaalisadii la hadley, labadoodiiba mar kale i fiiriyeen, buu dhakhtarkii yiri, maxaa kugu dhacey, miyaad gubatey. Labadeeniiba ma fahmin waxa uu ka wado. Ninkeygii baa ku celiyay waxa uu ka wado. Markaasuu sharaxey. Aniga waan baqdoo waxaan is iri ma ilmahiibaa wax ku dhacey oo labo asbuuc horteed baan barafka ku simbiriirixdey oo dhiig iga yimid. Ninkeygii baa qosley oo yiri, ma aysan guban ee gudniinkaa sidaa ka dhigey. Dhakhtarkii intuu yaabey buu yiri waxaan weligey ma maqlin, mana arag ee isuga dad kalaan kala tashan.

Anaga markiiba waa garaney in aysan dadkan weligood dhalin gabar la soo gudey, hadana lagu soo gudey fircooni. Cabaar ka dib markuu naga maqnaa, anigana xanuunka igu sii batey buu soo laabtey oo uu i umuliyay. Maadaama uusan dhakhtarkaa xirfad u laheyn umulin gabar gudan, intuu i umulinayay buu meel qalad ah iga jarey oo sababtey in dheecaan aan joogsan iga imaado. *Dhawrkii asbuuc ee dhalmada waa iska caadi in wax dheecaan ah kaa yimaado, laakiin markii dheecaankii iga joogsan waayay ilaa mudo 6 bilood ah, baa cabsi igu abuurmatey. Su'aasha aan is weydiiyay waxa ay tahey, dhakhaatir kala gedisan u tagey, qof wax gartaa waa la waayay. Daawooyin kala gedisan uun bey ii qoraan oo aan waxba isaga dareemin. Culimadii diinta baan dhibkeyga u sheegtey iyagana waxey igula taliyeen habka aan najaasada isaga ilaalin karo oo aan u tukan karo. Dhaceenka iga imaanayo waa wax aad u urbadan hadana ka badan wax dhecaan lagu tilmaamo, kana yar wax kaadi lagu tilmaamo. Ninkeygii waa is heyn weyney oo murugadeydii iyo urkii dartii waa kala tagney. Dalka mudo ka yar 3 sano baan joognaa, tuulo cidla ah oo wax ajaanib ah ama somali aan dageyn baan degan nahney. Ninkii markii uu i fureyba Oslo oo ah caasimada Norway ayuu u soo guurey. Meeshii baan cidlo ku noqoney. Aniga waxaa igu dhacey murugada umusha (postpartum depression), oo wax aan kala ogahey ma jirto. Wiilkeygii heyntiisii baa igu adkaatey, oo dad baa la ii keeney. Reerkaygii oo deganaa Jarmalka mudo lama hadlin oo waan gooyay. Qalbi aan kula hadlo iyo waxa aan u sheego ayaan garan waayay. Ma waxaan dhahaa ninkeygii ur dartii buu igu furey? Ma waxaan dhahaa meel cidlo ah baan daganahey ee iga soo gaara, markii horaba ninkan aan guursanayay waa la iiga digey ee anigaa diidey*

Ma waxaan dhahaa hooyo xun baan noqdey oo aan ilmaheeda korsan karin ee ii imaada. Waxaan oo dhan waxaa iiga fududaadey in aan iska dhinto, oo ceebteyda aan cidna ogaan. Cuntadii baan iska daayay. Nadaafadii baan iska daayay. Daawooyinkii aan cuni jirey baan joojiyay. Maalin baan sariirta ka soo kici waayay, oo afka abur iga yimid. Gabadhii ilmaha ii heyn jirtey baa ambulaas wacdey oo isbitaalka la i jiifiyay. Maadaama ninkii hore uu iigu diwaan gashnaa ehel iigu dhaw, isagii bey la xiriireen oo u sheegen xaalada waxa ay tahey. Isagana meeshuu ii imaan lahaa ama wiilkiisa soo doonan lahaa, buu isbitaalka waxuu siiyay telefonka hooyadey ee Jarmalka. Subixii ku xigey baa waxaa isbitaalka iigu yimid hooyo iyo walaalkey. Waxaan ka xasuustaa dhawr maalmood ka dib anigoo jooga gurigaan ku soo korey ee Jarmalka iyo wejiyo aan aqaan oo igu hareersan. Oohintaa kala joojin waayay. Waxey ii sheegeen in 3 maalmood faleebo igu socdey oo miyir la`aa.

Waxaa uu walaalkey ii geeyay dhakhtar oo gartey markiiba dhibkeyga. Waxuu yiri markii aad foolaneysey baad is goysey, goysmadaana dhakhtarkii ma aysan arag, maadaama aysan aqoon u laheyn gudniinka fircooniga iyo unugyada la googooyo oo difeetada ka dhalata markey umuleyso. Gabdho badan dhibkaa ku dhacey baa la ii keeney, oo aan daaweeyay buu yiri. Aniga meeshii furantey oo dheecaanka sababtey, buu intuu nadiifiyay dib u toley. Markii ay iyaga istaageen urkii iyo dheecaankii, baa nolol aduun qoruxdeed iyo macaankeed i balaamatey. Asbuuc ka dibba waxaan noqdey qofkii aan ahaan jirey. Farxadii iigu weynd ee aan markaa dareemey ma aheyn waxa iga harey, ee waxey wejiga wiilkeyga oo aan si fiican u arkey. Awal ciiro ayaa iga qarin jirtey. Mudo saddex billood ah dad kale ayaa korinayay, markaan qabtana indhaheyga ilin baa ka buuxi jirtey oo wejigiisa si fiican uma arki jirin. Markaasuu isagana ooyn jirey. Ilaah baa mahadaa iska leh, markaad dhibkaa soo aragto, baad dareemi qiimaha ay noloshada leedahey iyo waxa kaa maqan waxa uu yahey.”

Markaan soo laabtey waxbarasho ayaan bilaabey oo waxaan maantey ahey kalkaaliso umuliso. Hal ulajeedo keliya baana sidaa u noqdey - in aan ka badbaadiyo dhibka igu dhacey qoysaska iyo gabdhaha soomaaliyeed. Taana waa ku guuleysey dhawr jeer. Tuuladeydii baan dadkeedii is baraney oo kama guurin ilaa hada. Ilmo dambe ma dhalin oo wiilkeyga baa maantey jaamacada dhaktarnimo dhameyn raba mar dhaw. Anigana nin dambe ma guursan.

Ulajeedada hadalkeeda baa aheyd in ay ku baraarujiso shaqaalaha caafimaadka ee Norwey in ay raadsadaan aqoonta ku saabsan la macaamilka, talo siinta iyo daryeelida gabadh gudniinka Fircooniga lagu sameeyay.

## Farsama yaqaanada gudniinka fircooniga

Dumarka howshan qabta oo sancada gudniinka gabdhaha loo daayay waxey u badan yihiin dumar da`weyn, hido iyo dhaxal u yeesha sancadan, oo ay ka dhaxlaan hooyooyinkood. Hawshan ay qabtaan oo ah googoynta xubnaha ilmaha caruurta waxey u tahey shaqo ay ka xoogsadaan. Dadkaasi waxey u badan yihiin dad aan xirfad u laheyn waxa ay qabanayaan, markey noqoto aqoon caafimaad iyo mid guud, nadaafada iyo qalabka ay isticmaalayaan. Waxey u badan yihiin dad aan waxna akhriyi karin waxna qori karin. Marka loo eego wakhtiga casriga ah ee la joogo, ilaa hada dadkan ma helaan mana doontaan inay noqdaan xirfad layaal caafimaad oo aqoon u leh waxa ay qabanayaan. Ma heystaan shahaadooyin ay ku shaqo tagi karaan, wallow farsamada ay yaqaanaan ay tahay mid aan la ogolayn oo aan sharciba ahayn.


[29]

Wey jiraan dad yar oo aqoon u leh howshaa gudniin ay qabanayaan. Taana waxa kuu cadeynaya gabdhihii aan buuggan ku soo qaatey oo la gudey, balse gudniinkoodii uu ka halis yaraa gabdhaha kale badankood, sababtuna ay noqon karto in dadkii gudayay ay ahaayeen dad aqoon u leh howshaa, noocii gudniin ka qafiifsanaa iyo waalidkood maskax ahaan u soo diyaariyay. Nasiibkaa inta hesha waxa dhici karta in ay yihiin in yar oo kooban. Balse dalqaladayaasha caruurta googooya baa ciidaa ka badan, hadii kale dhibkaa ma bateen.

29 - Qalabka gudniinka FGM loo isticmaalo - https://www.google.no/search?q=fgm+instruments&tbm=isch&source=iu&ictx=1&fir=_rOt3xgZ1KWe0M%253A%252CJNbOR1HGaTrTbM%252C_&vet=1&usg=AI4_-kQ_FzyuMExzVEmMc1VJJ9YXUH_u6Q&sa=X&ved=2ahUKEwiMjojw98jlAhUSxosKHbcFBUsQ9QEwBXoECAUQDA#imgrc=_rOt3xgZ1KWe0M:&spf=1572608689543

30 - Qalabka gudniinka FGM loo isticmaalo - https://www.google.no/search?q=fgm+instruments&tbm=isch&source=iu&ictx=1&fir=_rOt3xgZ1KWe0M%253A%252CJNbOR1HGaTrTbM%252C_&vet=1&usg=AI4_-kQ_FzyuMExzVEmMc1VJJ9YXUH_u6Q&sa=X&ved=2ahUKEwiMjojw98jlAhUSxosKHbcFBUsQ9QEwBXoECAUQDA#imgrc=_rOt3xgZ1KWe0M:&spf=1572608689543

**Qalabka loo adeegsado fulina gudniinka Fircoongia**


30

Xirfadlayaasha ku hawlan arinta gudniinka Fircoonigu, waa kuwa inta badan ku qalabaysan, qalab aad iyo aad u gaboobay, oo nadaafadiisau liidato, inta badana ay ku sameeyeen qaaliimo badan iyagoo aan haysanin, ama aan awood u lahayn inay helaan qalab cusub. Qalabkaa waxaa ka mid ah Mindiyo, Makiinado, iyo Maqas.

## Dhibaatooyinka ay geystaan qalabkani

Waa qalab af beelay oo dhib ku hayaa marka qalinka lagu sameeynaayo qofka.
Waa qalab gaboobay, daxaleystay, maaraystay oo keeni kara inay gudbiyaan dhibaatooyin kale.
Waa qalab marar badan la isticmaalay, nadaafadiisana aan laga taxadarin oo hadhowtii jeermis fara badani ay fuusho, oo sababta markii la isticmaalayo in lagu sumoobo.

## Qaliinka koowaad - Xaalada ay ku sugan tahey marka la gudo

Gabadha markii la gudo xaaladooyin kala gedisan ayay markaa gashaa hadey noqoto shook iyo naxdin ama xanuunada jismiga ee qaliinka ka dhashey. Xanuunada shooga iyo cabsida waxey awoodoodu ku kala xiran tahey sida ilmaha looga soo dhaadhacsiiyay waxa lagu sameynayo. Ilmo waxaa jira sugi la` toogtoodii la gudi lahaa si loogu tiriyo in ay dad waaweyn noqdeen. Halka ay jiraan ilmo lagu soo gardaduubo waxan oo la soo siro iyagoon loo soo sheegin oo loo digin, qasab intii la isugu tago oo la xirxiro. Ilmahaas oo kale labo xanuun ayay ka dhaxlaan gudniinka. Midi waa shoogaa oo lagu kara darajo badnaan karo, tan kalana waa qalabkii sumeysnaa oo sugayo. Qalab aan nadiif aheyn, hadana aan seefeesneyn baa lagu jarjari.

Googoontaa xubinteeda taran waxaa ka dhasha dhaawacyo kala gedisan, hadey noqoto mid qalbi, mid dareen iyo mid jir.

Maalamaha ugu horeeya ka dib markii la gudo waxaa ku dhici karta gabadha in kaadida ku dhegto cabsi iyo naxdin darteed, ama in bararka dhaawaca ka dhasha ama dhiig isku gudba dartii, kaadi mareenka oo dhaawac soo gaaro dartii, lugaha gabadha oo la isku xidho darteed

iyo nabarkii oo caabuqa oo ay ka dhalato bakteeriya u keenta dhiiggeeda in uu sumooba oo ay teetano qaado – waxyaalahaas baa sababi kara in ay kaadidu ku dhegto dhimashana ay dhacdo.

## Qaliin labaad - Dhibka caadada

Markey gabadha qaangaadho oo uu ku dhaco dhiiga caadada waxey la kulantaa xanuuno badan sida in uu dhiigii ka soo wada bixi waayo. Taasoo keeni karta in bakteeriya ka dhalato halkaa, xanuuno badan la soo gudboonaadaan gabadha caabuqa dartii.

Dalkan Norway waxaa ka jira in gabdhaha caadada ku dhibtooda gudniin dartii ay heli karaan baaritaan caafimaad iyo dalab ay isku furi karto si kaadida iyo dhiiga caadi ahaan u soo baxaan, oo aysan ku xanuunsan. Talada ah in ay gabadhu is furto hadey ku xanuunsato dhiiga caadada dad badan baa qaata, balse waxaa jira gabdhaha keligood dalka soo galey iyagoo aan waalidkood la socon, gabdhahaa waxey u badan yihiin kuwo taladaa diida iyagoo ka baqaya in daloolka la weyneysiiyo hadhowtiina waxyeelo soo gaarsiiyo bikranimadooda, oo ay ku adkaato fursaddooda guurka. Runtii aad baan ula yaabey markaan la kulmey mid ka mid ah gabdhahaa oo wakhtigan aan joogno sidaa u fakareysa. Gabdhahaa qaarkood markey ka fursan waayaan furitaankaa waxaa la siiyaa warqad cadeyn in la furey.

## Xilliga guurka iyo foosha

Dhibkaa waxaa xigga kan marka ay aqal galeyso oo ay noqoto in mar kale hadana la furo. Marka ay dhaleyso gabadha la mariyay gudniinka Fircooniga unugga dhalmada ee la jar jaray uma fidmayo sida dumarka kale ee aan la googoyn xubnahooda, dabadeedne dhakhaatiirtu waxa ay ku qasbanaanayaan inay furaan xubintaa la giijiyay, badanaana waxaa dhacda in dib loo giijiyo dhalmada kaddib. Xilligaa ay foolaneyso waxaa dhici karta in foosha ay ku dheeraato ama in caafimaadkeeda ama kan ilmaha khatar uu galo. Hadeysan heysan markaa dad aqoon u leh howshaa waxaa ku dhici kartaa in hooyadaa ay isku dhiig baxdo oo halkaa ay ku umul raacdo dhalaankiina la galabsado.

Wakhti ayay ku qaadataa inay hooyadu ka soo kabato fooshii iyo umullidii adkayd, oo waxaa dhici karta inay nabarradii ka soo gaadhey caabuqaan oo hore u bogsoon waayaan. Dhiiggii badnaa dartiisna ay hooyadaa ku dhacdo dhiig yari. Hadey foosha ku adkaato waxaa ku dhici kartaa hooyadda in ay isku furanto oo kaadi galeenka ku furmaan xubinta galmada.

## Galmada iyo Fircooniga

Gudniinka gabdhaha oo dadyowga Somaliyeed ku dhaqmaan loona yaqaan Gudniinka Fircooniga ah (Female Genital Mutilation) waa qalliin halis ah oo curyaamiya xubnaha taranka ee haweenka iyada oo la minguuriyo ama la gooyo qayb weyn oo ka mid ah xubinta taranka taas oo aan la suuxin xilliga qalliinka lehna xanuun daran oo ka fog raxmadda. Gudniinkanu waxa uu keenaa dhiig-bax weyn marka gabadha la gudayo iyo marka la guursadaba, ragguna waxaa laga soo wariyay in dhibaato kala kulmaan maalmaha arooska.

Gudniinka Fircooniga ah waxa uu tirtiraa dhammaan wasladda hammad kordhinta ee haweenka ee ku daboolan xubinta tarankeeda iyo xataa dhinacyada xubintaba. Ma jirto meel ay Shareecada Islaamka kaga soo aroortay gudniinka daran ee lagu sameeyo gabdhaha. Shareecada Islaamku waxay oggoshay in gabdhaha lagu sameeyo gudniin fudud kaas oo ah in caarada kore laga jaro, taas oo hadana aan waajib ku aheyn waalidka oo layska deyn karo. Cutubyadii hore ayaan si fiican uga hadley arintaa Galmadu waa shay dabiici ah oo qofka Eebbe ku abuuro inta uu noolyahay waana raaxo muhiim ah oo naftu iyo jidhku u baahanyihiin inay helaan

Galmadu waa shay dabiici ah oo qofka Eebbe ku abuuro inta uu noolyahay waana raaxo muhiim ah oo naftu iyo jidhku u baahanyihiin inay helaan xilliga hordhaca galmada haweenka wakhti ka dheer kan ragga ayay ku qaataan kicinta dareenkooda. Marka ay gabadha fircoonsantaheyna waxaa dhici karta in wakhti ka sii dheer intii normalka aheyd ay u baahan tahey. Muhiimamada ay u leedahey kintirka galmada raaxada hore ayaan qodobkaa uga soo hadley. Faduma Shek Ali oo ah dhakhtarad dhimir (psychiaitirst) ayaa qoraal ay uga hadleyso galmada sidan ka tiri:- Waxa run ah in haweenka la guday intooda badan ay leeyihiin galmo aysan ku qanacsaneen. Sababtoo ah gabadhaha la guday waxay leeyihiin xubno taran oo ka duwan ka haweenka aan gudnayn, waxayna ku xidhan tahay habka ama nooca loo guday. Haweenka gudan waxa ka maqan qayb ama kintirka oo dhan, qayb ama dibnaha oo dhan, oo waa la isku tolay xubnaheeda taranka, hadii loo guday habka Fircooniga. Waxa jira orgasme ka yimaada kintirka iyo mid kayimaada xubinta taranka, markaa haweenka gudan waxay helaan orgasmaha xubinta taranka. Galmada sidoo kale waxay ku saabsan tahay in lamaanaha is qabaa is fahmaan taasina inta badan ma usuurto gasho bulshada uu ragu goaanka qoyska leeyahay`.

Shareecada Islaamka aad ayay u difaacdey xuquuqda raaxada galmada ee haweenka waxa ayna qabtaa in ragga iyo haweenku ka simanyihiin xuquuqda galmada dhinac kasta. Ujeedada guurka waxa weeye in lammaanuhu kala helaan raaxo, ubad, iyo inay ka horjoogsato dembiyada macaasida ama sinada. Waxay kale oo raaxada galmadu u suurtogelisaa in ammaanaha ay ku noolaadaan xasilooni, jacayl, kalgacal iyo naxariis.

Eebbe (S.W.T) isaga oo tilmaamaya wanaagga iyo qiimaha guurku leeyahay ayaa waxa uu Suuradda Arruum, aayadda 21aad ku leeyahay, “Oo waxaa ka mid ah Aayadihiisa inuu nafihiinna idiin abuuray ooriyo si aad ugu xasishaan, waxaanu ka yeelay dhexdiinna [Ragga iyo haweenka] kalgacal iyo naxariis.” Waxaa la soo weriyay in samankii Nebi Muxammed noolaa (N.N.K.H) ay haweeney Madina ku gudijirtay gabdhaha dabadeedna uu Rasuulku Ku yidhi, “Si daran ha u goyn waayo sidaasu waxay u fiicantahay gabadha waxayna u sii wanaagsantahay sayga [Guursandoona].” [Sunan Abu Daawuud]. Waxaan muran ku jirin in gudniinka fircooniga ah uu dhibaato caafimaad iyo dhibaato raaxaba u leeyahay gabadha. Dadka aaminsan gudniinka Fircooniga waxey ku doodaan in gudniinka uu ilaaliyo bikranimada gabadha si aanay u haweysan nin ilaa inta ay ka guursaneyso. Su’aashu waxay tahay: Haddii gabadha laga dilo hammadda Eebbe (S.W.T) u abuuray, sidee ayaa ay ugu hawoonaysaa nin mustaqbalka? Maxayse ku falaysaa guurka haddii raaxadiisa laga dhaawacey? Guurka tiirarkiisa ama faa’iidooyinkiisa ayaa ka mid ah in gabadha ku raaxeysato galmada sida uu ninku ugu raaxeysanayo. Xishoodka gabadha waa wax Eebbe ku talaalo oo ay ku ilaashato bikranimadeeda ee maaha wax gudniinku uu ilaasho.

Gudniinka Fircooniga waa dhaqan aad u xun oo oorida ka duudsiya raaxada galmada isla markaana saygeedu dareensaniiya in aanay lamaanihiisu la raaxo aheyn sida Eebbe u abuuray.

Dadyowga Somaliyeed meel kasta oo ay joogaan waxaa la gudboon inay joogteeyaan ololaha lagu tirtirayo dhaqankan foosha xun ee gudniinka fircooniga ee ku salaysan cadowtinimo iyo raaxo dilidda.

# CUTUBKA 4AAD
# HALISTA UU FIRCOONIGA LEEYAHAY

Dhibaatooyin faro badan oo kala halis gedisan baa laga dhaxlaa ku dhaqanka gudniinka fircooniga. Dhibaatooyinka baa qaar ka mid ah sababa dhimasho, halka qaarka kale ay noqdaan xanuuno waara oo aan laga bogsoon iyo halka kuwa kale ay noqdaan xanuuno gaaban oo markaa dhaca inta howsha gudniinka lagu jiro. Halista ugu daran ee gudniinka fircooniga sababo baa ah dhimasho. Dhimasho ka dhalata dhiigbax, qalab aan caafimaadka u rooneyn oo la isticmaalo iyo xubin si qalad ah loo gooyay ama lo toley. Sanadkii hore ee 2018 baa ilaa saddex dhacdo oo aad u murugo daraa dhanka warbaahinta laga warheley. Gabdho yar yar oo gudniinka Fircooniga dartii u dhintey. Waa suurtagal in musoobooyin intaa ka badan uu gudniinku Fircooniga sabab u yahey ay dhaceen, balse aan laga warhelin. Waxyaalaha muujinaya horumarka biseylka loo yahey baa ka mid ah in dhibabkan oo kale la soo bandhigo oo laga wada hadlo. Waxey taa dhalineysaa in qaladka laysla fahmo oo xal laysla raadiyo. Warbaahinta dalka oo soo gudbisey sanadkii hore labo gabdhood oo walaalo ah, da`doodana aheyd 10 jir iyo 11 jir in ay dhiig bax gudniin Fircooni dartii ay u dhinteen[ii]. Dhimasho aad looga murugoodey oo sababtey in warbaahinta caalamka ay arintaa ka hadlaan, taasoo sii kaliftey in dowlada ay ka jawaabi bixiso dilkaa. Waxaa arintaa ka hadley Ra`iisul Wasaare kuxigeenka Soomaaliya Mahdi Maxamed Guuleed[iii] oo yiri `Waa jaahilnimo aan la aqbali karin in qarnigan aynu ku jirno ay caruurtayada u dhintaan ku dhaqanka dhibkan caadada laga dhigtey. Caado aan sharci aheyn, diin ahaanna mamnuuc ah, caafimaad ahaanna u fiicneyn ilmaha in lagula dhaqmo`. Hadal la wada garanayo buu ku hadley, inkastoo ay ka sii fiicnaan laheyd hadalkaa in uu ficil la socon lahaa oo dembiilahaa ciqaabtiisa la sharciyen lahaa. Isla sanadkaa gudihii, waxaa markale 17-kii Luuliyo la soo bandhigey in hadana gabar kale oo 10 jir aheyd ay masiibadaa gudniinka fircooniga u dhimatey. Waa dhib kale. Dhakhtarkii loo geeyay Dr Cabdiraxmaan Cumar Xassan, agaasimaha isbitaalka Xanaano ee Dhuusamareeb baa laga hayaa in uu yir `weligey ma arag ilmo sidaa xubinta taranka looga jarjarey, gudniin fircooni dartii[iv]. Dhibkaa waxaa ka sii foolxumeyd in aabihii gabadha dhaley Daahir Nuur[v] oo wareysi uu siiyay VOA uu ku difaacayo waxuushnimadaa, uu gabadha ku waayay isuna heysan in uu yahey dilaa gabadhiisa galafsadey. Meelo ka mid ah buuga waxaa ku qoran in gudniinka Fircooniga uu yahay caado dhaqameed soo jiritaan dheer leh, muslim keliyana aan ku dhaqmin. Balse markaan dhageysanayay wareysiga aabahan[31] difaacayay ficilka gabadha wad u noqdey, waxaa ii muuqatey in dad qaar aysan ku dhaqanka caadadan u arag keliya caado dhaqameed balse ay la tahey ficil ama caado waajib ah. Kuma tilmaami karo diiniyan, maadaama diinta ay mamnuuceyso fircooniga, culimadana ay tahey meesha keliya ay isku wada raacsan yihiin markey noqoto fikirka gudniinka. Sow markaa ma mudno in lays weydiiyo waxa ku kalifayaa aabaha in uu difaaco ficil sidaa u halis badan, oo hadana diyaar u ah in gabdhihiisa kale ku sii sameeyo, oo uusan daryeeleen hadey ku dhintaan iyo hadii kalaba, sow laysma oran karo waa daruufooyin sababi kara aqoon xumo oo aysan ka aheyn xumaan waalidnimo ama naceyb ilmo.

---

31 - Gabar 10 sano jir ah oo u Dhimatay Gudniinka Fircooniga ah.- https://www.voasomali.com/a/4499007.html

Mid waa xaqiiq, oo sidaan waalid u ahey, baan u qiyaasi karaa in waalid walbaa ku hamiyo wanaaga, horumarka iyo waaritaanka ilmihii. Hamigaana aysan aqoon ku xirneyn. Hadaba waalid noocaa oo kale ah, sidaa u aamisan gudniinka halista badan, ilbaxnimadii waxgarasho ku yar tahey shakhsigaa iyo degaankaa, waxaa xakameyn karaa oo keliya waa marka ay jirto ciqaab iyo cabsi iyo sharci dambiyeynaya oo ka hortagi kara.

Raadreebka caafimaad daro ee gudniinka fircooniga ka dhasha baa waxaa loo qeybin karaa dhibaatooyin xanuunkooda gaaban yihiin, iyo dhibaatooyin xanuunkoodu waaro, marka laga reebo dhibaatooyinka dhimashada sababto oo aan soo xusney.

### *Dhibaatooyinka deg dega ah ee gudniinka fircooniga waxaa ka mid ah:-*

- ◊ Shoog iyo dhiig-bax, farsamo xumo oo geeri sababta
- ◊ Dhiig-bax fara badan oo sababi kara dhiig-yari
- ◊ Aqoon xumo darteed, in la jaro qaar ka mid ah kaadi-mareenka sida ibta oo kale
- ◊ Kaadida oo ku dhegta ama xiranta.
- ◊ Huritaan ama nabarka oo infekshan qaada.
- ◊ Qalabka wax lagu gudo oo nadiif ahayn oo ay ka dhashan karaan cudurada faafa sida Teetano.
- ◊ Xanuun daran waqtida gudniinka oo sababi kara suuxdin [32]

### *Dhibaatooyinka waara ee laga dhaxlo gudniinka fircooniga waxaa ka mid ah:-*

- ◊ Dhiigga-Caadada oo ku adkaada oo ku xanuun badnaato
- ◊ Foosha oo ku cuslaata ama isku raacdo (Obstructed Labor)
- ◊ Xanuun xilliga galmada
- ◊ Dhibsasho himiga galmada oo sababi kara qoys burbura
- ◊ In la jaro qaar kamida kaadi-mareenka sida ibta oo kale (Urethra)

U gudbin cudurada faafa sida Teetano qalabka oon nadiif ahayn dartii.[33]

Gudniinka Fircooniga oo ah jaritaan guud oo lagu sameeyo xubinta dareen wadka dumarka ayaa gabdhaha ku keenta dhibaatooyin farabadan maadaama xitaa dadka qaar ay jar-jaraan goobaha ku dhow dhow xubintaas. Sidaa darteed inta ay gabadha kawaanka lagu jarjarayo ay saaran tahey waxaa ku dhaca xanuuno ay ka mid yihiin shoog, dhiig bax, laxow, kaadida oo xiranta, mar kale oo gudniin kale lagu sameeyo iyo caadada dhiiga ay ku dhibaatooto.

Shooga ay qaliinka ka qaado baa labo nooc loo qeybin karaa. Shoog yimaada marka la gudayo oo aysan kabaabyo helin. Kabaabyo la`aantaa waxey sababtaa in bareesharka dhiigga uu aad hoos ugu dhaca, xawaaraha neefsashadana ay ku yarato. Taa oo sii sababi karta geeri. Shoogga kale baa noqon kara kan ku dhaca qalbiga. Xanuunka badan ee jarjaridaa leedahey, hadey noqoto mid jismi ama mid qalbi waxey ku abuurtaa ilmaha cabsi qalbi

32 - Dhibatooyinka laga Dhaxlo Gudniinka Fircooniga ah, 2017- http://somaliradio.ie/?p=411

33- Dhibatooyinka laga Dhaxlo Gudniinka Fircooniga ah, 2017 - http://somaliradio.ie/?p=411

Hadii ilmaha la gudayo, qalbi ahaan aan loo soo diyaarin, oo loo sheegin waxa uu gudniinku yahey, sababta loo gudayo, waxa lagu sameynayo, xanuunka ay le`ektahey, wargelintaa waxey u sahleysaa ilmaha in uu qalbi ahaan isku sii diyaariyo qaliinka oo jidhkeeda, qalbi ahaan iyo jismi ahaan ay u diyaarsan tahey. Balse hadii la siro oo la jajuubo oo lagu qasbo waxa aysan rabin waxaa raaci karta jirkeeda oo shoog gala oo aan is difaaci karin iyo iyadoo ka qaada baqdin iyo walwal joogta ah.

Kala-bax ama jabniin soo gaadha gabadha la gudayo maxaa yeelay awooda lagu hayo iyo xanuunka ay dareemayso waxa dhacda inta badan in ay xoog isku dhufato gabadha yar ee la gudayo.

Dhiig bax ku dhaca gabadha. Dadka wax guda oo u badan dad aan aqoon u laheyn cilmiga bayoolaji, qaab dhismeedka jirka bini aadamka iyo xididdada dhiigga qaada, ayaa iska qiyaasid ku jari kara xubin qalad oo dhiig bax yimaado.

Tolliinkii iyo qodbitaankii lagu sameeyo dhamaan meelihii la jar jaray waxeey baabi'iyeen shaqadii ay gudan lahayd xubintii dareen wadka dumarka.

Inta badan waxaa dhacda xilliyada caadada marka la gaaro in gabdhaha sidaas loo guday ay xinjiro dhiigga ku istaagaan taas oo keenta xanuun farabadan oo gumaarka ah iyo sidoo kale kelyo iyo dhabar xanuun.

Waxaa jira ilaa xad cilmi baaris yar oo laga sameeyay saameynta ay jaridda xubinta taranka dumarka ku leedahay faafidda jeermis dhaliyaha keena Aydhiska loona yaqaan

HIV. Daraasadaha qaar ayaa sheegaya inay jirto halis sii kordheysa oo jeermis dhaliyaha

HIV uu ku hayo dumarka lagu sameeyay gudniinka.[34]

Xanuunka kaadi imaanshaha iyo dhiigga caadada - Waxa laga yaabaa in marka gowraca (gudniinka) la fulinayo uu duleelka kaadida dhaawacmo maadaama uu si ba'an isugu dhow yahay Kintirka la dabar jarayo. Waxa kale oo laga yaabaa in daloolka dusha sare lagu abuurayo (Ilaah baa wax abuuri karee) uu aad ciriiri u noqdo oo laftiisu qayb ahaan ama guud ahaanba dhaawaca la bogsoodo. Arrintu uma baahna sharraxaad intaas ka badan bay ila tahay, maadaama meesha aan ka guuxayo la wada garanayo.

Xanuunka Nifaaska: Mar kasta ooy haweeneydu ummulayso waxa lagama maarmaan ah in lagu isticmaalo maqas iyo middiyo, si loo dillaaciyo looguna sameeyo dalool uu ilmuhu soo dhaafi karo, mashaqadaasi oo haweeneyda miskiinta ah ugu filan inu ku yimaado xanuunka Nifaaska ee dilaaga ahi Dhanka saameynta galmada oo lagu kala gedisan yahey. Dumar aan ka wada sheekeysaney dhankaa waxaan ka bartey, iyagoo gudniin fircooni soo wada marey in ay hadana ku kala dareen gedisnaayeen ku raaxeysiga galmada. Dumarkaa qaarkood waxey ka cawanayeen in ay curyaan ka

34 - Faafida HIV-AIDS iyo Gudniinka Fircooniga ah, 2007 - https://womensenews.org/2007/08/health-activists-link-spread-hiv-aids-fgm/

Sida la ogsoon yahey dareenka kacsi ee gabadha iyo u haweysiga galmo dareenkaa waa rabitaan ku abuuran qofka qalbigii, gudniinkana ma saari karo dareenka. Balse waxaa dhici karta in ay iman karaan carqalado xakameyn kara dareenkaa rabitaan galmo oo ka iman kara dhanka gudniinka, dhanka dhaqanka iyo bee`ada lagu nool yahey. Rabitaankaa baa ah mid qalbi iyo jismi. Gudniinka Fircooniga ah, waxey u badan tahey in uu dhaawac weyn soo gaarsiiyo oo uu hoos u dhigo rabitaankeeda. Cutubka hore waxaan ku soo sharaxey dareemada kintirka dumarka inta ay le`eg yihiin oo ay labo jibaar ku noqdaan kuwa ragga. Taa macnaheedu ma noqon karto in gabadha aan la gudin ay ka kacsi badan tahey gabadha la fircoomiyay balse xaqiiqda waxey tahey in gabadha la Fircoomiyay dareemo badan laga gooyay ama laga diley. Saameyn intee le`eg ayay ku yeelaneysaa dareenkeeda kacsi waa su`aal baaritaan dheer u baahan.

Tan kale, Dareenka ka dhasha galmada waa fal aad u adag oo ay ku lug leeyihiin shabakad weyn oo dareenwad ah oo ku yaala gudaha iyo hareeraha Cambarka, faruuryaha waaweyn iyo kuwa yar yar, afka ilma galeenka, ilma galeenka iyo Kintirka, taa waxaa sii dheer falgal nafsiyadeed iyo fikirka oo dowr weyn ka qaato. Hanny Lightfoot-Klein oo ah cilmi baaris madaxbanaan ayaa daraasado badan ka sameysey gudniinka Fircooniga mudo ku dhawaad 30 sano. Waxey fursad u heshey in ay la degto oo ay la noolaato dad badan oo Afrikaamiin ah oo kala dabakhadd nolaleed ahaa, hadey noqoto aqoon, dhaqaale gedisan si ay deristo hab dhaqamoodka gudniinkooda.

Daraasad[35] ayay ka sameysey wareysiyo ay la yeelatey dad ka badan 300 haween iyo 100 rag ah oo kuligood Suudaan ah baa waxey Lightfoot-Klein uga hadleysa ku raaxeysiga galmada iyo in uu gudniinka saameyn ku yeesho. Baaritaanadaa waxey soo wadey mudo shan sano ah. Gudniinka Suudaan oo la mid ah kan Fircooniga ee soomaalida ayay natiijadii daraasaddaa ku soo bandhigtey in rabitaanka galmada, raaxada, uu ku badan yahey haweenka gudniinka Fircooniga lagu sameeyay. Natiijadaa ay soo bandhigtey waxey su'aal weyn ku abuurtey dadkii qaasatan reer galbeedka oo aaminsanaa in kintirka uu qeyb muhiim uu ka yahey kacsiga iyo galmada. Waxey kaloo intaa ku dartey in dhaqamo qaarkood ay aamisan yihiin hadii aan kintarka laga jarin gabadha uu dheeraanayo ilaa xad oo meeshii loogu tala galey uu ka soo baxayo. Waxey tusaale ahaan u soo qaadatey in dadka Suudaan ay aaminsan yihiin haddii aan la jarin kintirka uu korayo oo dherer ahaan uu le`ekaanayo la xubinta ragga oo kale.

Aniso Maxamuud oo ka mid ah gabdhaha Fircooniga u gudan dhibaatooyin badan kala kulantay gudniinka dhibkaa baa ka warameysa xanuunada ay kala kulanto sida marka uu dhiga caadada ku dhaco oo kale iyadoo leh: - “Gudniinka firconiga dhibaatooyin badan baa kala kulmay aniga waan xanuunsan jiray marka dhiigga caadada igu soo socdo oo mindhiciraha iyo kelyaha ayaa i xanuuni jiray. Waxey kaloo ka sheekeysey dhibabka silsilada ah ay gabdhaa ceynkaa loo gudey la kulmaan xiliyada gabarnimadeeda, maalmaha guri galkeeda ugu horreeya, iyo marka ay dhalayaan. Waa saddexda xaaladood oo gabdhaha aan la gudin farxad weyn u leh, halkaa gabadha la jarjarey oo Fircooni loo gudey qatar weyn ay kala kulanto xaaladahaa. Aniso Maxamuud oo sii sharaxaysa xaaladeeda baa tiri ‘‘Markii la i guursaday waan dhiigbaxay dhalmadii markaan gaarayna waan ku dhibtooday, waa la i jarjaray todobo beri kor waa u kici waayay dhiig badan ayaa iga baxay cengerigii oo i mud mudaayo dhimasho ayaan ku dhowaaday’ [36]

35 - Maqaalka cilmi baarista, - Khibradda galmada iyo hagaajinta guurka ee gudniinka fircooniga ah iyo dumarka gudniinka fircooniga ah ee Suudaan, The Journal of Sex Research 2010 - https://www.tandfonline.com/doi/abs/10.1080/00224498909551521

36 -Gudniinka Fircooniga: Halis Ay Bulshada Qaar u Bareerto, 2016 - https://goobjoog.com/gudniinka-fircooniga-halisay-bulshada-qaar-u-bareerto/

Dareenka ka dhasha galmada waa fal aad u adag oo ay ku lug leeyihiin shabakad weyn oo dareenwad ah oo ku yaala gudaha iyo hareeraha Cambarka, faruuryaha waaweyn iyo kuwa yar yar, afka ilma galeenka, ilma galeenka iyo kintirka, taa waxaa sii dheer falgal nafsiyadeed iyo fikirka oo dowr weyn ka qaato.

Waxaan aad isugu dayay helitaanka hadii wax daraasaaad ah laga sameeyay dhibaatooyinka culeyska maskaxda (mental strain) ee uu gudniinka fircooniga ah sababo, qaasatan marka uu cuelyskaa maskax uu noqdo dhaawac saddex-laab ah (triple trauma), maadaama Soomaaliya ay aheyd dal mudo dheer dagaal iyo xasilooni xumo ku sugnaa. Waxaa aad looga hadley oo baaritaano badan laga sameeyay xanuunada iyo dhaawacyada jismi ee uu gudniinka fircooniga sababao, laakiin ma jirto ama anigaan helin macluumaad ku saabsan dhaawacyada uu gudniinku sababo xagga maskax iyo dareen, hadana dagaal dhexdii lagugu godey. Saameyn intee le`eg ayay sadex jibaarkaa dhibaa ku yeelan kartaa ilmaha caruurta ah oo markaa la gudey.

Nasiib wanaag dumarkii aan wareysey oo ku kala duwanaa da`da iyo xaalada madaniga oo qaar waxey ahaayeen xaasas, halka qaarka kale ayay dhalinyaro aan weli guursan ahaayeen. Dumarkaa waxey ila wadaageen in ay ku kala gedisan yihiin dhibaatooyinka dareenka maskax ay kala kulmeen gudniinka Fircooniga. Qaar waxey dareemayaan walbahaar iyo walwal sidii in dareemayaashooda kacisga ay ka maqan yihiin. Qaar kale waxey dareemaan xanuunada la xiriira imaanshaha dhiiga caadada, dhalmada ilmaha iyo galmada guurka, halka koox yara oo gabdhahaa ka mid ahaayeen aysan wax dhib ah kala kulmin gudniinka.

‘‘*Dhibaatooyinka waa badan yihiin waxaa ka mid ah dhiigbax sababi kara in loo geeriyoodo qalabka lagu gudo oo jeermis laga qaadi karo iyo cudurada faafa kaadida oo ku xiranta maadaama meelihii dhamaa la wada tolay markay dhaleyso iyo marka la guursadana xaalad kale oo qatara ayey wajahaan*’’ Dr Luux Maxamed Maxamuud.

Inkastoo aan la dabar jarin dhibaatada gudniinka fircooniga hadana waxaa jira baraarug badan oo xaga bulshada ah iyo dadaalo ay wadaan culimada iyo hay’adaha qaar oo ay ku doonayaan in lagu tirtiro gudniinkaas gabdhuhu ay dhibaatada kala kulmaan shareecada islaamkuna aysan banayn.

## Khataraha kale ee gudniinku keeno

**HIV/AIDS:** Maaddaama ay dumarka gabdhaha gudaa badanaa isticmaalaan mindiyo ama sakiino aan nadiif ahayn waxaa beryahan khataraha gudniinku fircooniga ah soo gelaya qaadida HIV/AIDS.

# CUTUBKA 5AAD
# WAXA UU XALKU NOQON KARO

Caadadan waxashinimo ee gudniinka Fircooniga waxay bulshada soomaaliyeed ku noqotey dhibaato lagama gudbaan ah. Istcimaalka iyo ku dhaqanka halistan Soomaaliya waxey ka mid tahey dalalka aduunka ugu horeeya. Wacyigelino badan oo laga sameeyay, dhibku ma yaraan. Ummalayn mayo in uu jiro waalid ubadkiisa raba in uu halaago, balse aqoon xumo iyo dhaqan xun u hogaansanaan ay u geyneyso inay halaagaan carruurtooda iyagoo isu heysta in ay wanaag sameynayaan oo ay adeecsan yihiin diin iyo dhaqan.

Fahanka bulshada marka uu heerkaa marayo, waa in xalka laga raadiyaa meesha ugu dhaw ay bulshadu ka warqaadato, waana diinta. Inta aynaan xalka gelin, aan isla yara fahano sababaha sahlaya ku dhaqanka waxashinimadan:

1. *Mas`uuliyad xumo*
   - Dadaal wada jira ah oo laga wada midaysan yahay oo aan jirin.
   - Madaxda bulshada iyo haldoorka bulshada oo aan u arag muhiim ka-hadalka dhibkan, iyagoo u arka in ay ceeb iyo arrin dumar oo aan fiicnayn ay tahay.
   - Soomaalida oo u badan dad reer guuraaya, walina dhaqankii ku sii dheggan, inta badan meelaha miyigaa oo laga isticmaalana aan la gaadhsiin.
   - Sharciyo adag oo awoodiisu muuqato, ficilkaana dambiyeynaya baan jirin.
   - Dumarka oo raba in dhaqankani sii socdo, ahna kuwa ugu horreyaa ee joojin kara, dhibaatada ugu culusina ay ka soo gaarto.
   - Dumarka hawshan ku shaqeysta oo aan inta badan aan degganayn magaalooyinka.
2. *Shaki kala qab*
   - Dad badan oo ka biyo diidsan wax ka qabadka iyo u ololaynta arrintan, ayna u arkaan wax dibad-da uga yimid.
   - Maadaama dalkii muddo dheer burbursanaa, hay`adihii dawladda oo ilaalin lahaa, dhawri lahaa xaquuqda iyo baahida muwaadinka iyana ay meeshii ka bexeen waxay sababtey in hay`ado iyo ururo aan dawli ahayn bilaabaan ka shaqaynta iyo wacyi gelinta arrintan, dadka qaarkiina u qaa-tay inay yihiin dad aan dantood wadin balse meelo kale laga soo riixayo. Taasina ay keentay kalsoonidii iyo wada shaqeyntii oo lunta, shaki iyo tuhunna abuurmo.
3. *Shaqo u abuurid*
   - Dumarka ku shaqaysta hawshan gudniinka Fircooniga ah, shaqay u tahay ay nolol maalmeelkooda ka soo saartaan.

Xalku waxaan u arkaa in uu ku jiro wada shaqeyn saddex geesood ah

- Mas`uuliyad dawladnimo
- Dhanka tacliinta iyo waxbarashada
- Dhanka diinta iyo culimmada

La dagaallanka gudniinka Fircooniga ilaa burburkii xukuummaddii Siyaad Barre waxay ahayd hawl ay ururo iyo shakhsiyaad gaar ahi masuu’liyaddeeda dhabarka u riteen. Xukuummada Soomaaliya waxa laga doonayaa in ay mas`uuliyadda howshan horjooge u noqoto, iyadoo kaalmeysaneysa hay`adaha arrintan xirfadda dheer u leh. Dastuurka Qarranka wuxuu sheegayaa in gudniinka mamnuuc yahay. Hadaba ma gudniin oo dhan miyaa mamnuuc ah mise kan Ficooniga oo keliya? Tan kale, mamnuucid keliya wax tari mayso, waa in dembiilaha dembigan geysta ciqaab adag la muteysiiyaa.

Tacliintu waa hubka ugu waxtarka badan ee looga hortegi laguna yarayn karo dhibaatadan. Manhajka waxbarashada ardeyda iyo dadka waaweyn in lagu soo daro arrintan, fasalada looga hadlaa oo wacyigelinta halkaa laga bilaabo.

Iyadoo dhanka waxbarashada loo marayo waa in waaliddiinta la baraa qiimaha iyo xurmaynta xaquuqda ilmaha. Dhaqan ahaan waxaan qiimeynaa tirada ilmaha la dhalo, laakiin tayadooda mihimmad weyn lama siiyo. Waa in waliddiinta la baraa xaquuqda ilmaha oo diideysan dilaanta koriimada, googoynta gudniinka iyo xumeenta ilmaha afka laga ceynayo iyadoo quluubta ilmaha la dhaawacayo.

Culimmada mas`uuliyad weyn baa iyagana ka saaran ciribtirka dhibkan. Waa in iyaga marka hore fikrad ku wada heshiiyaan, siday Fircooniga ugu heshiiyeen waa in sunnadana ugu heshiiyaan mawqif cadna iska wada taagaan. Maalaayiin Soomaaliya oo qurbaha ku nool baa dalalkay joogaan gudniinka laga ogolayn. Halka malaayiinta Soomaalidaa ee dalka hooyo ku nooli ay ku damqanayaan caadadan. Haddaba, sidee mustaqbalka guurka jiilalkan soo socdaa noqon karaa? Taranka bulsho xaggee buu ku dambayn doonaa, hadii labo jiil oo aan taranka isla fahmeyn isku soo baxaan? Sidaa darteed ayey muhiim u tahey in culimmada ka qayb qaataan badbaadada jiilalka dambe. “Qosol wuxu ka joogaa, qubanaha dambeetoo, qarka soo jafaayee”

Markii laysla helo mas`uuliyad dowladnimo, tacliin iyo sharciyo loo hogaansanyahay, way fududaan kartaa in la helo qodobka ugu dambeeya oo ah, wada shaqeyn guud oo bulsho, dhallinyaro iyo waayeelba leh.

Marka aad rabto in aad isbeddel wanaagsan abuurto waa muhim in laysla fahansanyahay waxa la beddelayo, waana muhiim in uu jiraa rabitaan iyo ficil wada jira.

Waxaan ku soo qaatey buugga tusaalooyin kala duwan si aan u muujiyo saameynta kala duwan ee uu dhibkaani ku yeeshay gabdhaheenna iyo hooyooyinkeenna dal iyo dibadba.

# CUTUBKA 6AAD
# XIGASHO - GUNAANAD - TIXRAAC

Cutubkan waxaan ugu talagalay in aan isugu soo aruuriyo fikdradaha kala duwan ee horyaaladda dumarka, dal iyo dibadba bulshada. Waxaan weydiiyey kulligood hal su`aal oo isku mid ah oo ah:- Sidee kula tahay in lagu ciribtir karo gudniinka? Waxaan ka codsaday kulligood jawaabta ay ii soo dirayaan in ayan ka badnaan hal ama labo jumlo ama weedho.
Marka aan si fiican u eego dhammaan macluumaadkii aan ku soo uruuriyey buuggan waxaan rajeynayaa in qof walbaa uu si fiican uga dhargey in gudniinka khasaaro mooyee wax faa`iido ah aysan ugu jirin gabadha iyo bulshada ay la nooshahay.

Waxaan si kooban uga hadlay taariikhda gudniinka, siday ku bilaabatay iyo siday aduunka ugu fidday. Waxaan kaloo isku dayey in aan iftiimiyo waxay diintu ka qabto gudniinka dumarka guud ahaan, gaar ahaanna gudniinka Fircoonigaa. Kan Fircooniga isku mawqif ayay culimmadu ka qabaan, balse kan sunniga bay ku kala aragti geddisan yihiin. Cutubkaas iima dhameystirna balse gadaal ayaan ka dhameystiri doonaa hadii Rabi idmo. Waxaan kaloo ka hadlay waxa uu Firooniga yahay, halista uu leeyahay iyo waxa xalku uu noqon karo.

Marka aad rabto in aad isbeddel wanaagsan abuurto waa muhim in laysla fahansanyahay waxa la beddelayo, waana muhiim in uu jiraa rabitaan iyo ficil wada jira.

Waxaan ku soo qaatey buugga tusaalooyin kala duwan si aan u muujiyo saameynta kala duwan ee uu dhibkaani ku yeeshay gabdhaheenna iyo hooyooyinkeenna dal iyo dibadba.

# Tixraac

Cutubkaani waxaa uu ka kooban yahay, dhamaanba macluumadka lagu soo uruuriyey buuggan, iyo meelihi laga keenay ee wararka baaxadda leh ee cilmiga ah, iyo cidd mid walba lahayd ee qortay in la magaac dhebo, si buuggu uga badbaado in lagu tilmaamo xatooyo, waxaana buugga ku tibaaxay dhacdo walbaa meeshii ay ka dhacday, halkii laga keenay, isagoo tibaaxay ciddii waraysatay, qortay iyo cidii soo gudbisayba.

https://www.caasimada.net/gudniinka-fircooniga-ah-iyo-galmada/

http://raaxadanolasha.blogspot.com/2012/11/gudniinka-fircooniga-iyo.html

https://www.bbc.com/somali/war-42961979

http://somalidoc.com/smf/index.php?topic=1907.0

https://goobjoog.com/gudniinka-fircooniga-halisay-bulshada-qaar-u-bareerto/

http://www.daryeelmagazine.com/xog-ku-saabsan-gudniinka-fircooniga-iyo-dhibaatooyinka-guurka/

https://horseedmedia.net/2011/08/14/aqoon-iswaydaarsi-ku-saabsan-gudniinka-fircooniga-ah-oo-lagu-qabtay-qardhosawiro/

http://bandhige.com/maxaad-ka-taqaanaa-gudniinka-fircooniga-ah-wq-dr-cabdiraxmaan-maxamed-cismaan/

https://dr-insi.blogspot.com/2010/08/gudniinka-gabdhaha_31.html

https://dr-insi.blogspot.com/2010/09/gudniinka-gabdhaha.html

https://dr-insi.blogspot.com/2010/09/gudniinka-gabdhaha_13.html

https://norad.no/globalassets/publikasjoner/publikasjoner-2016/ngo-gjennomganger/2016-somalia-evaluation---protecting-women-and-girls-against-sgbv-htps-and-participation-of-women-in-peace-building.pdf

https://norad.no/globalassets/import-2162015-80434-am/www.norad.no-ny/filarkiv/ngo-evaluations/female-genital-mutilation-fgm-program.pdf

https://www.norway.no/en/ethiopia/norway-ethiopia/news-events/news2/joint-fgm-programme-of-nca-and-save-the-children-in-ethiopia-and-somalia-meeting/

https://www.cmi.no/news/2131-fighting-fgm-an-ambitious-strategy

https://qz.com/610930/unicef-98-of-women-in-somalia-have-undergone-female-genital-mutilation/

https://www.msdmanuals.com/home/women-s-health-issues/biology-of-the-female-reproductive-system/female-external-genital-organs

---

ii) https://www.bbc.com/somali/war-45555685
iii) https://time.com/5396125/somalia-female-genital-mutilation-death/
iv) https://www.bbc.com/somali/war-44922724
v) https://www.bbc.com/somali/war-44922724

Xigasho aruurinta shacab weynaha

Sidee kula tahey in gudniinka lagu ciribtiri karo?`



Gudniinka Fircooniga ah waa mid diin ahaan iyo dadnimo ahaanba u khaldan, loona baahanyahay inaan si wadajir ah u cirib tirno. Caadadan foosha xun, inkastoo ay sii dabar go'ayso, haddana wali waxaa jira dad ku dhaqmo iyo gabdho yaryar oo wali dhibbanayaal u ah qarnigan 21-aad.

Waxaan ula dagaallami karnaa inaan wacyigelin buuxda u sameyno waalidiinta sida ay haatan sameysay Marwo Ubax Cabdullaahi iyo inaan adkeyno shuruucda lagula xisaabtamayo kuwa ku xadgudbaya xuquuqda gabdhaha Soomaaliyeed."

**Marwo dalka Saynab Cabdi Macallin**



Sida uu qabo Dastuurka KMG ah - Cutubka 2aad, Qodobka 15aad; farqadiisa (4) Gudniinka gabdhaha waa caado naxariis-darro iyo xaqiraad u dhiganta jirdil. gudniinka gabdhaha waa reeban yahay. Haddaba si loo xoojiyo waxaa lagama maarmaan ah in la qaado olole iyo wacyi gelin bulshadeed oo ku saabsan gudniinka isla markaasna loo sheegayo in lagu mutaysanayo ciqaab qofkii lagu helo ficil gudnin.

**Zahra Ali Hassan, Lataliye,**

Wasaaradda Arrimaha Dastuurka - Xukuumadda Federaalka Soomaaliya



Aniga siday iila muuqato, ciribtirka gudniinka waxaa saldhig u noqon kara in bulsdada qaybaheeda ka duwan ay helaan aqoon iyo wacyigelin ku filan. Waayo dhaqamada foosha xun waxay salka ku hayaan jahli iyo wacyi la`aan.

**Dr. Maryan Qassim**

Wasiiradii hore ee waxbarashada, caafimaadka, jinsiga iyo arrimaha bini'aadanimada



Wacyi gelinta ummada, tifaftirka iyo kala saarka dhaqanka qalafsan iyo in aan wax laga badalin abuurka Allah-fahamka caqabadaha iyo dhibaatada caafimaad ee gabdhaha haysta: sharciyada oo la dhaqan geliyo laguna kormeero si loo hubiyo habsami socodkooda ayaa lagu cirib tiri karaa gudniinka gabdhaha

**Anisa Hajimumi**n,

MA Lataliye istaraati, Wasiiradii hore ee Puntland ee Arimaha Qoyska iyo Haweenka



Dadka oo loo sharxo dhibatoyinka gudniinka iyo dowlada oo soo saarto qaanuuno lagu cinqaabayo qofkii gaysta dhibkas.-

**Kadra Yusuf**

Cilmibaare, hay'adda Cilmi-baarista iyo Horumarinta Bariga Africa

Xigasho aruurinta shacab weynaha

Sidee kula tahey in gudniinka lagu ciribtiri karo?`



Waxaa lagu ciribtiri karaa markii ay bulshada iyo dowladu ay si wadajir ah u ugu wada istaagaan sidii loo helihaa sharciyo adag oo ciqaabaya qof walba oo dhiirigaliya, taageera ama gacan ka geysta sameynta gudniinka gabdhaha.

**Sareed Mohamed Hassan**

Agaasimaha cadaaladda jinsiga ee Soomaaliya .



Gudniinka waa wax ay soomaalidu diin ahaan u aamineen wayna adagtahay in dhaqso loo cirib tiro karo. Marka hore waa in dadka laga wacyi geliyaa meelaha uu ku badan yahay loona sheega in uu dhib badan laga dhaxlo iyo cudura badan. Waa in dadka u aaminsan diin ahaan loo sheega in aan diin ahayn. Si loo cirib tiro waa in dadka loo keeno wax yaabo ay ku qancaan sida dad dhibta ka sheekaynaya waxa ay kala kulmeen iyo wax yaabo ay amaaniaan si ay is kaga daayaan dhibtaan dumarka daashatay.

**Saciido Mahamed Hassan**
Xildhibaanad



Gudniinka waxaan qabaa in lagu daro manhajka waxbarashadda si dadka looga wacyi geliyo. Waa dhaqan aan diin ku saleysneen. Markaa waxaan qabaa in iskuulada, hay`adaha waxbarashada sida iskuulada, jaamacadaha laga baro ardeyda.

**Anab Mohmaed Dahir,**
musharaxadii heer federal iyo heer gobol madaxweyne isku sharaxdey.



Waxaa lagu cirib tiri karaa in waaladiinta lagu wacyigaliyo in gudninku aslanba yahay dhaqan.uusan ahayn waajib. Gebi ahaan fikirkeyga maba aaminsani.in lagudo gabdhaha

**Shamsa Sheikh Ibrahim,**
Waziir ku xigeenka shaqada iyo shaqaalaha dowlad gobboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya



Gudniinka waxaa lagu is ciribtiri karaa, labo shuruud oo la helo
(1) - In laga soo saaro shirci siyaasaded heer federal iyo mid maamul gobaleedba,
(2) - In dadka la wacyigaliyo,

**Fardowsa Osman Egal**
Wasiir dawlaha wasarada Shaqada,Shaqalaha, Dhalinyara iyo Cayaaraha

Xigasho aruurinta shacab weynaha

Sidee kula tahey in gudniinka lagu ciribtiri karo?`



Waxa lago cirib tiri karaa in dadka soomaaliyeed ay helaan wacyi galin sidoo kale hoyooyinka shaqada ka dhigtay gudniinka gabdhaha waa in dowladda hoose ay shaqo abuur u sameysaa.

Looga digo hadii ay markale sameeyaan danbigaas in sharciga la horkeeni doono oo ciqaab adag ay mutetstaan si markale aan la isugu dayin.

**Abshiro Ahmed Kadiye**
Jubaland– Soomaaliya



Waxaa loo baahan yahay in aabuhu uu door ku yeesho go'aan qaadashada guditaanka gabadhiisa oo uusan u arkin masuuliyad ay leedahay Hooyada kaligeed

**Dr. Yusra Mohamed Yassin**
Puntland



Sida ugu wanaagsan ee lagu cirib tiri karo gudniinka waa dhanka waxbarashada iyo in kuwa dhaacawaya gabdhaha yar yar ee masaakiinta ah la ciqaabo.

**Dr. Warsan Ismail**,
Norway



Si loo loo cirib tiro tacadiyada dumarka loo geysto, waa la hirgaliyo siyaasadaha iyo sharciyada lagu ciribtirayo kala duwanaanshaha jinsiga iyo dhammaan noocyada takoorka ee ka dhanka ah dumarka

**Hawa Hassan Mohamed**
Danjiraha Zambia,
Wasiirkii hore ee caafimaadka ee dowladda federalka.



Waxaa lagu ciribtiri karaa in la fahansiiyo dumarka in gudniinkaa xanuun naafeenayo caafimaadkooda iyo mustaqbalka ubadkooda, jidh ahaan iyo maskax ahaanba.

**Asma Saeed Yousuf** – Ilaaliye xauuqda dhalinyarada iyo haweena, Somaliland

Xigasho aruurinta shacab weynaha

Sidee kula tahey in gudniinka lagu ciribtiri karo?`



Waa in fahanka bulashada la xoojiyaa oo la baraa in aysan arintaan wax diin ah ku luglaheyn, gabadhana ay sidooda nadiif ku yihiin, kuna ilaalsanyihiin

**Fatima Bashiir Abdi**
Hogaamiye mashruuc gudniin ee ururka badbaadinta carruurta caalamiga



*Sida ugu muhiimsan ee lagu ciribtiri karo caadadan waa markii ay dadweynaha helaan wacyi gelin ku saabsan halisaha uu gudniinkan sababo hadey noqoto xanuunka dhiig caadada, dhiiga baxa iyo isku furanka xilliga dhalmada yimaada, foosha oo dheeraato ama adkaato, dhibaatooyin qalbi oo ku dhaca gabadhaa. Waxaas dhibaatoo oo dhan waxaa looga hortegi karaa marka ay dadweynaha ay helaan aqoon iyo wacyi gelin ku saabsan dhibka.*

***Dr. Fatima Abdisalam.***



Bulshada soomaali ma laha dhaqan furfuran oo ay uga wada hadli karaan arimaha la xiriira jirka iyo galmada. Waxaan u baahananheny wadahadalo arimahaa la xiriira si ay dadka u fahmaan dhibka waxa uu yahey, isla markaana ay u sahlanaato sidii loo ciribtiri lahaa. Nimanka waa in si fiican loo baraa, loona tusaa waxaa uu gudniinka Fircooniga yahey iyo dhibka uu sababo si ay gabdhahooda uga badbaadsadaan.
Wadaadada iyo xukuumadaa waa in ay la hadal la sameeyaan dumarka si looga dhaadhacsiiyo in gudniinkan uusan wax diiniyan ah uusan aheyn.

**Fadumo Ahmed Baadi,**
Xaquuqda dumar u ololeeya Waqooyi-Bari ee Kenya



Dad badan oo Soomaali ah ayaa aaminsan in gudniinka dumarka uu yahey dhaqan Islaam ah. Taasi run ma aha sidaas darteedna waxaa loo baahan yahey codadka hoggaamiyeyaasha diinta. Waxbarasho ragga iyo dumarka iyo awood siinta iyo madaxbanaanida dhaqaalaha ee dumar.

**Dr. Fatuma Shek Ali,**
Dhakhtarka dhimirka, Denmark

Ubah Abdullah Aden:- somali-norwegian, ku dhalatey Moqdisho, ku barbaartey caruurna ku korrisa dalka Norway, caasimadiisa Oslo. Aqoonyahanad baratey cilmigga maamulka iyo maareynta oo labo master ku heysata, siyaasiyad ka tirsan xisbiga Shaqaalaha oo xilal kala gedisan u soo qabatey dalka iyo dadka norway. Kobcinta iyo dhisida bulsho wanaagsan waxa ay ku xiran tahey muhii-mada la saaro ilaalinta xaquuqda iyo buuxinta baahida muwaadinta. Gudniinka Fircooniga 'WadHaween' waxa uu bulshada Soomaali ku noqdey dhib lagama gudbaan ah iyo ceeb joogta. Gabdhaha Soomaali waxa qaawiyay, oo sharafta iyo qiimaha ay mudnaayeen daciifiyay waa marka uu cambarkeedu noqdey macduuc aduun weynaha u qalan. Oo sidii looga badbaadin lahaa kuwii dad ugu dhawaa oo badbaadinteed lahaa. Hindisaha buuggan ayaa ah lahaansho abuurid iyo wacyigelin mas'uuliyideysan. Markii dhibka laysku qirto waxey kaliftaa in uu xal dhasho, naxariisna timaado.



**Qoraa: Ubah Abdullah Aden**